مؤسسة دار الفكر
Dar Al-Fiker Foudation
فنفني – إثيوبيا

# مقاصد الشريعة دليل للمبتدئ

جاسر عودة

# Ujeedooyinka Shareecada Tusmada billaaabaha

By Tifaftiruh

Jaasir Cowdah

Turjumaadda

Hey'adda Daarulfikri

Finfinne – Itoobiya 2021 G. C

# مقاصد الشريعة دليل للمبتدئ

# جاسر عودة

# Ujeedooyinka Shareecada

# Tusmada billaaabaha

# By Tifaftiruh

Jaasir Cowdah

# Turjumaadda

Xurunta daarulfikri

*Xuquuqda daabacaadda wuxuu sharcigu u ilaalinayaa xarunta daarulfikri*

Hinfinne – itoobiya 2021 G. C

**DF-E-TrBs-21/85**

## Contents

Gogoldhig ....................................................................4
**Hordhaca Qoraaga ee ku saabsan buuga iyo turjumaadiisa** .....6
**Cutubkaka koobaad** ....................................................................8
**Waa maxey Ujeeddooyinku?** ....................................................8
**Baaxadda Ujeedooyinka** ..........................................................13
**Dadaalkii Saxaabadu u galeen fahanka ujeedooyinka shareecada** ..................................................................25
**Aragtiyadii ugu horeeyey ee ujeedooyinka shareecada** .........30
**Cutubka Labaad** ....................................................................35
**Imaamyda Cilimga Ujeedooyinka ee Qarnigii Shanaad ilaa Siddeeedaad** ....................................................................35
**Imaa Al-juweyni iyo "baahiyada guud"** ...................................36
**Imam Al-gasaali iyo Tartiibinta "Daruurooyinka"** ...................37
**Cissaddiin ibnu Cabdissalaam iyo "Xikmadda ka Danbeysa Axkaamta"** ....................................................................38
**Imaamulqaraafi iyo "Anwaacu Tasurrufaatinnabiy"** ...............39
**Imam Ibnul Qayim iyo "Xaqiiqada Shareecada"** .......................40
**Imaamu Shaadibi iyo Aragtidiisa Ujeedooyinku iney ka mid yihiin "Usuusha Shareecada"** ..............................................42
**Cutubka Seddexaad** ..................................................................44
**Dowrka ay Ujeedooyinku ku leeyihiin Cusbooneysiinta Islaamiga Casrigeenna Maanta** ..............................................44

**Ujeedooyinka Shareecada iyo Mashruuca Horumarinta iyo Xuquuqda Aadamaha**......................................................45

**Ujeedooyinka Shareecada oo aasaas u noqda Ijtihaadyo – Dadaallo- cusub**..............................................................53

**Kala Saaridda Wadiiqooyika iyo Yoolasha** ..............................62

**Ujeedooyinka Shareecada iyo Tafsiirka Mowduuciga ah ee Quraan kariimka**.............................................................66

**Fahanka Ujeedooyinka Nabawiga ah**......................................68

**Marmarsiiyo Furid iyo OOdid** ..................................................74

**Xaqiijinta Ujeeddada "Caalaminimada Shareecada"** ..............80

**Ujeedooyinka Shareecadu waa mabaadi' ay wadaagaan madaahibta kala duwanee Islaamku** .......................................82

**Ujeedooyinku waa Dhidibada wada Hadalka Diimaha** ...........84

**Dhaqan Galinta Ujeedooyinka Shareecada** .............................87

**Gunaanad** ...............................................................................96

## Gogoldhig

Waxaa farxad u ah, Mac-hadka Caalamiga ee fikirka Islaamka, inuu soo bandhigo, tusmadan xanbaarasan, qeexitaanka mawduucyada ujeeddooyinka shariicada islaamka, waana yoolashaa waaweyn ee sharci dajinta islaamka. Qoraha buuga oo ah, Dr. Jaasir Cowdah waa aqoonyahan ku takhasusey culuum kala duwan, gaar ahaan dhinaca ujeeddooyinka shariicada. Maadaama ay koobantahay tirade qormooyinka ku qoran afka ingirrisiga ee ka hadlaya mawduuca ujeedooyinka shariiada; ayaa wuxuu gu'aamiyey mac-hadka caalamigu inuu bannaankan isagoo faraya aqoonyahada kartida u leh iney turjumaan oo daabacaan, kutubta la xidhiidha ujeeddooyinka shariicada, iyadoo looga dan leeyahay inuu bandhigo mawduucan culeyska badan akhristayaasha afka ingiriisika, mac-hadkuna ilaa maanta wuxuu turjumey oo uu daabacay kutubtan oo kala ah: ***ujeeddooyinka shariicada*** oo qorey: Sh. Max'ed al-daahir Ibn caashuur; ***aragtida ujeeddooyinka sida uu qabo imamu shaadibi*** oo uu qorey Dr. Axmed al-reysuuni; ***hawlgalinta ujeeddooyinka shariicada*** oo uu qorey Dr. Jamaaluddiin Cadiya. Sidoo kale wuxuu mac-hadku daabacey kitaabka ah: ***ujeeddooyinka shariicada waa falsafadda sharci dajinta islaaka: aragti habeysan*** qoraagiisuna yahay: Dr. Jaasir Cawdah (waxaana socota turjumaadiisa afka carabiga). Maadaama mawduucu yahay mid isdhexgal badan leh, culeysna ku keeni kara maskaxda, kutubtii la daabacey badankeeduna aheyd mid ku wajahan culumada iyo aqoonyahanda sare; ayaa mac-hadku wuxuu daabacayaa oo kele, kutub ka fudud kuwaa hore isla mawduucaana ku saabsan; si ay uga qeb-noqoto silsiladda

buugaag xilliyaadka diyaarinaya macluumaad fudud oo akhristaha caadigu hore u fahmi karo, kuwaas oo ay ka mid yihiin: ***tusmaha fudud ee ujeeddooyinka shariicada*** oo uu qorey Dr. Max'ed Haashim Kamaalii iyo ***aragtida islaamka ee horumarka iyadoo laga dab qaadanayo ujeeddooyinka shariicada*** oo uu qorey: Dr. Max'ed Cumar Tashaabra, Afka carabigaana loo turjumey mar dhawna waa la daabici doona haduu Eebe idmo.

Anas Al-Sheekh Cali

La taliyaha akaadimiga ee Mac-hadka caalamiga ee fikirka islaamka – laanta ***london***

Landan Juunyo 2010m Rajab 1431h

## Hordhaca Qoraaga ee ku saabsan buuga iyo turjumaadiisa

Mac-hadka caalamiga ee fikirka islaamka daneynta uu u hayo cilmigan ujeeddooyinka shariicada waa mid horeysey, waxeyna la bilaabatey aasaaskii mac-hadkan qottada dheer siddeetamaadkii qarnigii tagey, sida la wada ogsoonyaheyna waxey ka muuqataa buugaagta kala duwan ee uu mac-hadku daabaco iyo dhaqdhaqaaqyadiisa joogtada ah ee ku cusbooneysiiyey meela badan oo caalamka islaamka ka mid ah dib u baadhista cilmigan, shantii sanee u danbeyseyna wuxuu mac-hadku ku howlanaa inuu ku faafiyo cilmigan afka ingiriisiga, isagoo ku qabtey: dood cilmiyeedyo, siminaaro iyo muxaadarooyin waddamo kala duwan, soona saarey buugaag badanoo laga turjumey afka carabiga iyo kuwo kaloo af ingirriskaba lagu soo saarey.

Waxaanan horey afka ingiriisiga ku qorey kitaab yar oon ku magacaabey “ujeeddooyinka shariicadu waa falsafadda jideynta shariicada islaamka: aragti nidaamsan”, mac-hadkuna daabacey, haseyaashee weynida kitaabka iyo luqadiisa adag ayaa waxey ka hor joogsadeen in dad badanoo af ingriiska akhriya ay si fiican uga faa’ideystaan. Sidaa darteed ayuu walaakeyga qaaliga ah: Anas Sh. Cali ii wediiyey inaan ku qoro kitaab fudud oo cilmigan ah afka ingiriisiga, oo hage u noqda bilaabayaasha sida culuumta kaleba luugu sameeyo. Markaasaan qorey anigoo ula jeeda iney ka faa’ideystaan muslimiinta aa ku takhasusin culuumta shariicada, markey fahmaana ay dalbdaan in dheera ah, bal kuwa aan muslimiinta aheyna ay akhristaan, baadhaanna falsafadda jideynata ee diinta islaamka, isweydiimona ay ka keenaan.

Kaddibna waxaan inaan arko kitaabkii oo afkeena caribiga uu ku turjumey –isagoo mahadsan- walaalkey: Dr. Cabdulatiif Khayaad –Allaha ka abaal mariyee- isagoo macna fudud oo lagu dhibaatooneyn ku wada turjumey; eraydii, odhaahyadii iyo dhamaan cadeymihii ku soo aroorey kitaabka. Ardeyda culuumta shariicada ee aadka ugu xiisaha qaba mawduucanna, waxaan u tilmaamayaa kitaabkeyga ku magacaaban: “ فقه المقاصد: نوط الأحكام الشرعية بمقاصدها” dabcadiisa sedexaad(2008) oo ka mid ah buugaagta uu daabacey mac-hadku iyo kuwo kaloo badan oo khuseeya mawduucan, kuna qoran afka carbiga iyo afaf kaleba.

Waxaanan abaal marin weyn Alle uga baryayaa cidda gacanta ku heysa mac-hadkan heerka sare ah, cilmiganna uu nooleeyo, ummaddana ku ballaadhiyo kuna anfaco.

Jaasir Cowdah

Dowxa, juunyo 2010m

Rajab, 1431h

## Cutubkaka koobaad

## Waa maxey Ujeeddooyinku?

Heerar "maxaa sababey"

Waxaa dhacda in badan, iney caruuruhu su'aalo si kadis ah noo weydiiyaan, qofnase ma oga iney su, aasha ula kaseen ama iska yidhaahdeen! Waxaase nasiib wanaag ah; su'aasha caruurtu inta badan aqoon hore ama qaab uu soo bartey kuma saleysna, sida dadka waaweyn ay u yidhaahdaan "waxani sidan unbuu iska ahaa". Inta badan casharada cilmigan ujeeddooyinka shariicada waxaan ku bilaabaa, qiso gabdh yari aabaheed ay ku weydiisey: "Aabo maxaad leydhka cas ee wadda baabuurta uga joogsataa?" aabihii baa ku jawaabey: " leydhka cas maa daamuu iftiimey, iftiimiddiisuna waxey ka dhigantahey joogso", laakiin gabadhu mar kaley weydiisey: "laakiin sabab?" aabihii baa ku jawaabey: "si uunan tarafigu iigu goynin warqad ganaax", gabadhii baa sii wadatey oo tidhi: "laakiin muxuu taraafigu warqad ganaax ah dadka ugu gooyaa?" , aabihii baa ku jawaabey: "waa tahay; leydhka cas oo laga gudbo halis ayaa ku jirta", gabadhii sii wadatey oo tidhi: "waa maxey?" markaasuu aabuhu yidhi: "arrimahaa sidaa iska ah". Laakiinse wuxuu gu'aansadey inuu u dulqaato gabadhiisa oo uu yidhi: "maxaa yeeley ma haboona inaan dadka dhibno, ma jeceshahay inuu dhib ku soo gaadho?" gabadhii baa tidhi: "maya!" aabihii baa sii watey: "waa sidaa dadkuna inuu dhib soo gaadho ma rabaan" Nabigeena (scw) wuxuu yidhi: "waxaad naftaada la jeceshahay dadkana la jeclow." Laakiin gabadhii kama istaagin baadhitaankii, waxeyna weydiisey: "maxaad ula jeclaaneysaa dadka waxaad naftaada la

jeceshahey?” aabihii baa inyar fikirey oo yidhi: “maxaa yeeley dadkoo dhan wey siman yihiin, hadey su’aashu noqoto: sabab? Waxaan ku jawaabi: Ilaahey waa caadil, cadaaladiisana waxaa ka mid ah inuu dadka si siman u abuurey, xuquuq siman baan leenahay, jirataankuna wuxuu ku saleysanyahey sinnaan!

Su’aasha ah: “waayo?” waxey u dhigantaa su’aasha ah : “waa maxey u jeedooyiku?” waxeyna u dhigantaa oo kale “heerarka lagu baadhayo sabaabta”, weedhan oo ka mid ah weedhaha aqoonyahanada falsafadda, iyada unbaana ah “badhitaanka heerarka ujeeddooyinka” sida fuqahada muslimiintu u yaqaanniin. Markaan u gudubnona badhitaanka aan ku sameeneyno heerarka

“sababta” iyo lafa guridda ujeedooyinka, taasina waxey deneynteena ka gudbineysaa arimaha fudud; sida: “leydhka” baabuurta tusaale ahaan, iney baabuurtu joogsato markuu casaanku iftiimo, waxeyna inaga gudbineysaa heerarka ka fikirka falalka iyo calaamadaha oon ka fikiro heerarka qawaaniinta iyo qaacidooyinka, una sii gudubno ka fikirka masaalixda iyo manaafacaadka la wadaago, sida: daneynta nabadgaliya dadka kale taasoo keeneysa iney iyaguna daneeyaan nabadgaliyadeena, ugu danbeyna inaan u gudibno ka fikirka mabaadii’da waaweyn iyo caqiidooyinka aasaasiga ah, sida: mabda’a cadaaladda, naxariista iyo sifaadka Allaha sareeya. Sidaa awgeed “ujeedooyinka shareecadu” waa laama ka mid ah laamaha aqoonta islaamka, taasoo ka jawaabeysa dhammaan su’aalaha adag ee lagu soo koobi karo “waayo?” ama “sabab?”

oo raaci karta heerarkeeda kala duwan, waxaanan halkan ku soo aroorineynaa qaar ka mid ah su’aalahaas:

Maxey sako bixintu u tahey mid ka mid ah tiirasha islaamka?

Maxey waajib u tahay in loo sama falo dariska?

Maxey u tahay salaanta muslimiintu “nabadgaliyo”?

Muslimku maalintii muxuu shan goor u tukadaa?

Soonka bisha Ramadaan muxuu uga mid noqdey tiirasha islaamka?

Muslimiintu maxey mar walba Alle u xusaan?

Maxey u tahey cabidda khamradu dambi weyn in yarba ha noqotee?

Muxuu islaamku dil ugu xukumey qofkii si ula kac ah qof u dila amaba sineysta?

Ujeedooyinka shareecadu waxey cadeeyaan xikmadda ka danbeysa axkaamta islaamka, tusaale ahaan: xikmada ah “xoojinta xidhiidhka bulshada” waxey ka mid tahaey xikmadaha ku jira waajibinta sakada; oo ka mid yihiin “dariska oo loo sama falo” iyo “odhaahda nabadgaliyada oo la isku salaamo”.

Xikmadaha kale ee ka danbeeya axkaamta waxaa ka mid ah: “Alle ka cabsiga” waxeyna tahaey sababaha loo waajibiyey soonka, salaadda iyo sakada.

Sidoo kale ujeedooyinka shareecadu waa yoolal wanaagsan oo sharci dajinta lagu xaqiijinayo, iyadoo arrimona la mamnuucayo kuwa kawa kalena la banneynayo.

Tusaale ahaan ujeedooyinka shareecad mid ka mid ah waa: “ilaalinta nolosha miyirka dadka” taana waxaa cadeynaya xarrimidda gu’an ee diintu xaaraantinimeysey maandooriyaha, iyo ujeeddada kale ah “ilaalinta hantida iyo sharafta dadka” taasoo laga dhuganayo ciqaabta dilka ee lagu qaadayo cidii geysata; dil, kufsi iyo fallaagow, sida aayadaha qur’aaka ee albaqarah: 178 iyo almaa’idah: 33 ku cad.

Sidoo kale ujeedooyinka shareecadu waa yoolal Alle iyo argti dhaqameed ku dhisan jideynta axkaamta islaamka, sida mabda’a cadaaladda, sharafta banii aadantinimada, rabitaanka xorta ah, dhaqn wanaaga, dhowrsoonaanta, fudeydinta iyo iskaashiga bulshada.

Yoolalkan iyo aragtiyada noocan ah, waxey noqon karaan kaabad isku xidha axkaamta shareecada islaamka iyo aragtiyooyinka baahsan ee maanta ka sheekeynaya xuquuqda insaanka, horumarka, cadaaladda iyo bulshada, waxeyna jawaabo u noqon karaan qaar ka mid ah su’aalahan soo socda oo kale:

Maxey noqon kartaa waddada ugu wanaagsan ee loogu akhriyi karo quraanka iyo suunada, dibna loogu fasiri karo iyadoo laga duulayo xaqiiqooyinka la gaadhey caalamkeenna maanta?

Waa maxey aragtida uu islaamku ka qabo “xurriyadda” iyo “cadaaladda”

Waa maxey dhinacyada ay iska waafaqsanyihiin sharci dajinta islaamka iyo aragtiyada cusub ee ku wajahan xuquuqal insaanka iyo nidaamka islaamka?

Sideebey shareecada islaamku uga qeyb qaadan kartaa “dhaqanka” iyo “cadaaladda bulshada”?

Haseyeeshee geedi-socodkeena xiga wuxuu noqonayaa qeexid erayo iyo diraaseyn dhab ah oon ku sameyno aragtida ujeedooyinka shareecada.

Macnaha labada erey ee ah "مقاصد" ujeedooyin "مصالح" danaha, markaan u noqonno afka carabiga kalmadda "مقاصد" waxey jamac u tahay "مقصد" oo macnaheedu yahey: ujeeddo, yool, gol, dan iyo muraad, waxeyna noqoneysaa ujeedada iyo danta laga jideynta xukun ka mid ah axkaamta islaamka. Fuqahada-culumada fiqhiga- qaarkood waxey u arkaan labada erey "مقاصد"ujeedooyin iyo "مصالح" faa’idooyin iney isku mid yihiin. Cabdulmalik aljuweyni (dh: 478H/1085m) oo ka mid ah culumadii ugu horeysey eek a qeyb qaadatey aragtida “**ujeedooyinka**” iyo horumarinteeda wuxuu u adeegsadey labada erey si isku mid ah. Waxaa ka daba yimid Abuu xaamid alqasaali (dh: 505H/1111m) oo raad raacey aljuwweyni oo ujeedooyinka hoos geeyey masaalixda. Kadibna waxaa yimid Fakhriddiin alraasi (dh: 606H/1209m) iyo al Aamidi oo (dh: 631h/234m) waxeyna qeexitaanka labada erey ku raaceen al Qasaali. Dabadoodna waxaa yimid Najmuddiin al Duufii (dh: 716h/1315m) oo maslaxadda ku qeexey iney tahay “sababta lagu gaadhayo ujeedada shaarica/sharci dajiyaha” (waana allah iyo rasuulkiisa). Al qaraafina (dh: 1285h/1868m) wuxuu dajiyey qaacido oo uu

yidhi: "sharcigu ma tixgalinayo ujeedada aan lagu gaadheynin dan sax ah oo dheef keeneysa ama dhib ka hor tageysa". Taasina waxey ka dhigantahay ujeedo kasta waxey shareecada ugu taallaa xaqiijinta maslaxadda dadka, caqliga iyo garaadkuna wuxuu fahmayaa yoolasha aragtida "ujeedooyinka shareecada".

## Baaxadda Ujeedooyinka

Ujeedooyinka shareecada islaamku waxey soo mareen noocya kala duwan oo qeybqeybin ah, iyadoo ku saleysan hadba sida uu arko caalimka baaxadda ay gaadhsiisanyihiin ujeedooyinku, baaxadahaasna waxaa ka mid ah:

1- Heerarka daruurooyinka (waxyaabaha lama huraanka ah)
2- Fagaaraha axkaamta xaqiijineysa ujeedooyinka
3- Noocyada dadka ay ujeedooyinku saameynayaan
4- Heerarka saameynta ujeeddooyinka

Qaabkii ugu horeeyey ee loo qeybiyey ujeedooyinka shareecada wuxuu leeyayhay seddex heer; kuwaasoo ah: daruurooyin-lama huraanno-, rabitaano iyo qurxisooyin. Kadib culumadu waxey daruurooyinka u qeybiyeen shan, waana: "ilaalinta diinta, nafta, hantida, caqliga iyo taranka". Culumada qaarkoodna waxey ku dareen mid lixaad oo ah "ilaalinta sharafta". Hadaba daruurooyinkaa shanta ah waa waxyaabo lagama maarmaan u ah nolosha dadka ama dhimashadooda. Tusaale ahaan nolosha dadku halis ayey galeysaa haduu miyirkoodu doorsoomo, halkaana waxaan ka fahmeynaa sida uu islaamku u adkeeyey xaaraantinimada maandooriyaha guud ahaanba.


Sidoo kale nolosha halis ayey galeysaa hadii naftooda la ilaalin waayo iyadoo la qaadanayo tallaabooyin lagaga hortagayo xanuunada iyo wasakhowga deegaanada ay ku noolyihiin. Taana waxaan ka fahmeynaa sida uu nabigeenu (scw) u adkeeyey xaaraantinimada in wax loo geysto naf banii aadam, bal ta xayawaanka iyo dhirtababa. Sidoo kale nolosha dadku halis ayey galeysaa hadii dhib dhaqaale ay dhacdo, sidaa awgeed ayuu uu xarrimey islaamku, keydinta iyo qarinta badeecadaha, ribada, khiyaamada iyo nooc kastoo xumeynta ganacsiga ah. Darajada sarreysa ee uu islaamku siiyey ilaalinta taranka waa sirta ku jirta axkaamta faraha badan ee loo jideeyey nidaaminta iyo xoojinta xidhiidhka qoyska iyo in sida ugu fiican ee la heli karo loo xanaaneeyo caruurta, waxna la baro. Ilaalinta diintuna waxey lagama maarmaan u tahay nolosha dadka, siiba noloshooda danbe (aakhiro)! Maxaa yeeley islaamku wuxuu u arkaa noloshu iney tahay socdaal, qeybtiisa yar ay tahay noloshan adduun-dhow-intiisaa kalena ay tahay nolosha aakhiro-danbe-! Waxaan heshiis lagu wada yahay in ilaalinta daruurooyinkaa-lama huraanadaa-aan soo sheegney ay yahay ujeedooyinka ugu waaweyn ee ka danbeeya jideynta dhammaan axkaamta islaamka iyo diimaha nabiyada kale oo dhan.

Heerka daruurooyinka (lama huraannada/lagama maarmaanada) waxaa ku xiga darajada rabitaanada, waana darajo ka hooseysa daruurooyinka marka loo eego nolosha dadka, tusaalayaasheedana waxaa ka mid ah; guurka, ganacasiga iyo gaadidka, oo dadku arimahan wey rabaan weyna u baahanyihiin, laakiinse uma dhimanayaan hadey waayaan gaar ahaan markey taagantahay heer shakhsi, islaamku wuxuu dhiiri galiyey in si

nidaamsan looga jawaabo rabitaanadaas. Tusaale ahaan, nolosha dadku khatar ma galeyso hadey dadka qaarkii gu’aansadaan ineynan guursan, amaba ganacsan. Haseyeeshee, in badan oo dadka ka mid ah hadeynan rabitaankaa helin, waxey ka gudbeysaa darajo “rabitaan/baahi”, waxeyna u gudbeysaa darajada “daruurooyinka/lama huraanada”, sidaa awgeed bey u timid qaacidada fiqhiga ee tidhaahda “baahidu hadey ballaadhato waxey u gudubtaa daruuro”, waxaana macnaheedu yahay: rabitaan kasta oo saameeya tiro badan oo dad ah, waa in loola dhaqmaa sida daruurada. Qurxisooyinkuse waa arimo nolosha qurxiya/wanaajiya, sida cadarada, dharka soo jiidashada leh iyo aqallada qurxoon, islaamkuna wuu jecelyahay quruxda, wuxuuna u arkaa fadli Alle iyo naxariistiisa een la soo koobi Karin, wuxuu ku dhiiri galiyaa muslimiinta ineyna mudnaan weyn siinin darajadan dambe oo ay ta horeysa ku dadaalaan.

Waxaana jira is dhexgal iyo xidhiidh wadaag ka dhaxeeya ujeedooyinkan faraha badan, tanna waxaa si gaar ah u eegey Imaamu Shaadibi (oon dib ka arki doono dadaalkiisa). Tusaale ahaan guurka iyo ganacsigu waxey ka tirsanyihiin darajada “rabitaanada”, waxeyna faa’ida u yihiin ilaalinta taranka iyo maalka, waxeyna xidhiidh adag la leeyihiin labdan arimood ee ka tirsan daruurooyinka, sidaaseyntusaalayaashu u badanyihiin. Sidaa darteed; “rabitaanada” mid ka mid ah oo nuqsaan weyni ku timaado waxey ka dhigeysaa “daruurooyin”, ganacsiga oo kale hadii dhaqdhaqaaq la’aan weyni ku timaado, dhibtani ganacsiga oo horey u ahaa, “rabitaan” waxey kor ugu qaadeysaa darajada “daruurada” sidaan horeyba u sheegney.

Sidaa darteed bey u arkaan fuqahadu heerarka daruurooyinku iney yihiin ku is dhex gala oo dhinacyada isku haya intey noqon lahaayeen kuwo kala koreeya. Tusaale ahaan waxaad eegtaa qaabkan hoos ku yaalla.




**Tartiibinta taagan ee ujeedooyinka shareecada islaamka (heerarka daruurada)**

Waxey heerarka daruurooyinku ina xasuusinayaan qaabkii uu Abraham Maaslo uu u dhigey badhtamihii qarnigii 20aad masaalixda iyo rabitaanada banii aadmiga, kuna magacaabey “jaranjarada baahiyada”.  Baahida dadku sida uu u arko Abraham Maaslo wey kala duwanyihiin, waxeyna ka billowdaan baahida asaasiga ee jidhka oo ay soo raacdo nabadgaliyadu, waxaana xiga baahida jeceylka iyo tixgalinta, ugu dambeyna ta “muujinta

shakhsiyadda". Abraham Maslo wuxuu soo bandhigey sanadii 1947kii, shan darajo oo baahiyada banii aadiga ah, kadib sanadii 1970kii ayuu badaley aragtidiisii, wuxuuna soo bandhigey jaranjarro ka kooban 7darjo oo baahiyada ama rabitaanada dadka, waxaa deymo gaar ah mudan isu ekaanshaha sida ay u soo bandhigeen labada aqoonyahan ee Shaadibi iyo Maaslo heerarka ujeedooyinka. Jaranjarrada danbe ee maaslo waxey u egtahay aragtiyada "ujeedooyinka shareecada islaamka marka laga eego isbaddalada iyo horumarka waqtigu watto ee ku iman kara. Aragtiyada ujeedooyinka shareecada islaamka isbadalo ayaa ku sameysmey qarniyadii la soo maraey, siiba qarnigii 20aad. Culumada ***usuululfiqhiga*** ee casrigani waxey dhaliileen tartiibintii hore ee heerarka daruurooyinka een horey u soo sheegney, waxeyna ku dhaliileen dhowr arimood oo ay ka mid yihiin kawan hoos ku yaalla:

1-Aragtiyadii hore ee ujeedooyinka shareecadu waxey tilmaamayaan shareecada duuduub ahaanteeda, waxaana yar inta ay taabanayaan laamaha gaarka ee shareecada. Tusaale ahaan qaab-qeybiskii guud ee hore ee ujeedooyinka shareecadu kama jawaabayaan su'aalaha tafatiran een soo sheegney, kuwaasoo ku wada bilaabanaya weydiinta ah "maxey?"

2- Qaabkoodan hore ee ujeedooyinka loo dhigey waxey ka hadlaan oo kaliya ah ashkhaasta, oo qoysaska bulshooyinka iyo dadka guud ahaan waxba kama taabtaan; si wax ay shareecada islaamku, shakhsiga, noloshiisa, xoolihiisa iyo sharaftiisa kaliya uun mudnaanta siineyso, iyadoon bulshooyinka noloshooda,

dhaqaalahooda, sharaftooda iyo karaamadooda aan deymo u laheyn, taasoo ah wax ayna shareecadu ku sifeysneyn.

3- Qaab-qeybintii hore ee u jeedooyinku in kastoo ay heerarka daruurooyinka ay baadhitaan badan ku sameysaey, hadana ma aynan kulansannin mabadii'da daruurooyinka kuwooda ugu waaweyn oo ay ka mid yihiin: cadaaladda iyo xurriyadda.

5- Ujeedooyinkaa waxaa laga dheehdey ama lagala baxey dhaxalka fiqhi eey culumadu qoreen, ee lagama dheehanin assalka shareecada oo quraanka iyo sunnada ah.

Culumada casrigan joogtana waxey isku dayeen iney daboolaan, dhinacyada dhiman een soo sheegney, waxeyna soo bandhigeen aragtiyo iyo qaab-qeybin cusub oo siineysa ujeedooyinka shareecada baaxado cusub. Marka loo eego baaxadda ay dabooli karto axkaamta shareecadu, waxey ujeedooyinka shareecada u qeybiyeen seddex heer/darajo:

1- Ujeedooyinka guud: waana ku laga dareemayo iney ku jiraan dhamaan laamaha shareecada oo dhan, sida daruurooyinka iyo rabitaanada aan soo sheegney oo kale, iyo ujeedooyin baryahan danbe laga doodey, sida "cadaaladda bulshadeed", "caalaminimada" iyo "fududeynta".

2- Ujeedooyin gaar ah: waana kuwa la dareemayo iney ku jiraan laama gaar ah oo laamaha shareecada ka mid ah, sida ilaalinta maslaxadda caruurta, xeerarka qoyska marka laga hadlayo, in laga celiyo dambiilayaashu iney dambi geystaan marka la dajinayo xeerarka ciqaabaha iyo in la mamnuuco

keydinta/qarinta badeecadaha-iyadoo aad loogu baahanyahay-marka la dajinayo shuruucda u gaarka arrimaha ganacsiga.

3- Ujeedooyinka kooban: waana kuwa tilmaama “sababta” ka danbeysa ama “ujeedada” ku jirta ***nas***-aayad ama xadiis-ama xukun gaar ah, sida: in la cadeeyo xaqiiqada ka danbeysa tirada markhaatiyaasha ay shareecadu siyaabo kala duwan u waajibineyso, ujeedada ka danbeysa in loo ogolaado qof soomani oo buka inuu afuro iyo xikmada ku jirta quudinta masaakinta hilbaha adaaxida maalmaha ciidda iyo mamnuucidda ku soo aroortey keydinta hilibka adaaxida.

Arimahaa aan soo sheegney dartood iyo dhameystirka waxa ay culumada casrigani ku dhaliileen qaabkii hore ee ujeedooyinka shareecada loo dhigey oo ay ku tilmaameen iney deymo shakhsiyadeed ku saleysantahay, ayey u jiheysteen iney ballaadhiyaan baaxaadda ujeedooyinka shareecada, si ay u gaadho: qoyska, bulshada iyo banii aadiga oo dhan. Ibnu Caashuur sheekha la yidhaahdo oo ka mid ah culumada casrigan wuxuu baadhitaan ku sameeyey ujeedooyinka saameynaya umada oo dhan, wuxuuna siinayaa ujeedooyinkaas mudnaan dheeri ah oo dhaafsan ujeedooyinka ku kooban danaha shakhsiyaadka. Sidoo kale waxaan arkeynaa Sh. Rashiid Rida oo aragtida uu ka qaatey ujeedooyinka shareecada gaadhsiiyey “wanaajinta” iyo “xuquuqda dumarka”. Sidoo kale Sh.Yuusuf Alqardaawii ayaa gaadhsiiyey aragtidiisa ujeedooyinku iney kulansanayaan “karaamada insaanka” iyo “xuquuqul insaanka”.

Ballaadhinta lagu sameeyey baaxadda ujeedooyinka waxey u furtey fagaarayaal ay kula jaan qaado qadiyadaha iyo

waxyaabaaha aadka loo daneeyo maanta, caalimkuna ka bilaabo "ufiirsashada xikmada ka danbeysa axkaamta shareecada" si uu muuqaaleysto qorshayaal cilmi oo wanaajin iyo cusbooneysiin ah. Waxey kaloo culumadu u adeegsadeen ujeedooyinka shareecada iyo nidaamyadey ku saleysantahay ajandayaal lagaga doodi karo, arimaha; waddaninnimada, iskaashiga iyo xuquuqul insaanka, marka la joogo wadamada muslimiintu ku tira yartahay.

Ugu danbeyna culumadu waxey soo bandhigeen ujeedooyin tilmaamo caalamiya leh; taasoo ay si toos ah ay ugala soo baxeen ***nusuusta*** (Qua'aanka ama xadiiska), iyadoon laga qaadannin kutubta ***Fiqhiga*** ee ***Mad-hab*** kaliaya ku kooban. Bandhigaa danbe wax yaabaha uu kaga duwanyahay kuuwii hore waxaa ka mid ah, in fatwooyinkiisu ka gubayaan isbaddallada samanka sida ku dhacdey qaar ka mid ah fatwooyinkii salafka, ereyadan danbese ee loo isticmaaley ujeedooyinka cusubna waxey ka turjumayaan mabaadii'da sare islaamka. waxaanan hoos ku soo bandhigeynaa ujeedooyinkaa ***nusuusta*** *tooska* looga qaatey qaar ka mid ah:

1- Sh. Maxamed Rashiid Rida (dh:1935m/1354h) ayaa aad ugu fiirsadey Qur'aanka kariimka ah, si u helo wixii u jeedooyin ah eek u jira, wuxuu heley in ujeedooyinka Qur'aanka ku jiraayi ay kulansadaan "wanaajinta tiirasha diinta, caddeymo ku saabsan arrimaha nabiyada, caddeyn in diinta islaamku tahay diinta abuurka, caqliga, aqoonta, xikmadda, caddeymaha, xurriyadda iyo madaxbanaanida, wanaajinta xaaladaha bulsho iyo siyaasadeed ee dadka, waajibaadka shakhsiyeed ee amarada rabbi iyo diidmooyinkiisaba, xidhiidhada caalami, wanaajinta

hantida iyo dhaqaalaha, celinta dhibaatooyinka dagaalada, buuxinta xuquuqda dumarka, xoreynta banii aadmiga".

2- Sh Daahir Ibn Caashuur (dh: 1907m/1325h) ayaa wuxuu soo bandhigey aragtida ah in ujeedooyinka caalaiga ah ee shareecada islaamku yihiin u dhidib aasidda "ilaalinta nidaamka umadda, sinnaan, xoriyad, wada dhaqan, ilaalinta fidrada (abuurka). Waxaa xusid mudan in qodobka "xurriyadda" ah ee ibnu Caashuur iyo culuma kaleba ay sheegeen inuu ka duwanyahay "xuriyadda" loola jeedo addoonimo ka xoroobid. Hase yeeshee waxaa jira ereyga "مشيئة" doonis, oo culumadii hore isticmaali jireen oo siyaabo badan ugu eg macna ahaan ereyga "xuriyad" iyo "doonis xor ah". Sida xuriyada aaminida (diinta) oo ka aragno Quraanka kariimka ah: ( فمن شاء فليؤمن ومن شاء فليكفر. الكهف: 29). Erey bixinta marka loo eego se, ereyga "xuriyad" wuxuu ereybixinada islaamka soo galey waqti dhow. Wuxuuna sheegey Ibnu caashuur inuu ku baraarugey ereyga "xuriyad" oo uu u arkey inuu yahey udubada ujeedooyinka shareecada islaamka markuu arkey qoraaladii laga qorey kacaankii faransiiska oo ahaa kuwa loo turjumey afka carabiga qarnigii 19naad, hase yeeshee wuxuu aad u faahfaahiyey macnaha islaamiga ee "xuriyada fikirka, diinta iyo wax sheega" iyo sidii loo dhaqan galin lahaa shareeca ahaan.

3- Sh. Muxamad Alqazaalii (dh: 1996m/1416h) wuxuu ku baaqey in druus laga dheehdo 14kii qarni ee taariikhda islaamka ee la soo dhaafey, wuxuuna u arkey in "xuriyada iyo cadaaladu" ka mid yihiin ujeedooyinka shareecada ee lagama maarmaanka ah. Wuxuuna aad u dhaliiley argtida sida deymo la'aanta ah u raaceysa wax walboo ku soo aroorey dhaxalka diinta, qofkii u


fiirsadana qoraaladiisa wuxuu arkayaa iney ku saleysanyihii tiirasha ujeedooyinka shareecada, tusaale ahaan markuu ka hadlayo sinnaanta iyo cadaaladda bulshada, waana labada mabda' ee uu ku dhisey aragtiyadiisa cusub ee caanka ah ee uu ka qabo dumarka iyo arimo kaleba.


4- Sidoo kale Sh. Yuusuf Alqardaawi (dha:1345h/1926m) ayaa wuxuu u kuur galey Quraanka kariim ah, wuxuuna gaadhey ujeedooyinkan guud "sixidda aragtiyada ku saabsan Ilaahey farriintiisa iyo abaal gudkiisa, guaaminta karaamada banii aadamka iyo xuquuqdiisa, cibaadada Alle oo lagu baaqey, nadiifinta nafta aadamaha iyo toosinta dhaqankiisa, abuurida qoys wanaagsan iyo u cadaalad-falka dumarka, dhisid ummadii ka makhaati noqon laheyd dadka iyo iskaashi caalami ah oo ka dhaxeeya aduun weynaha oo dhan. Wuxuuna ka digeyAlqardaawi in isku dayo soo bandhigida ijeedooyinka guud ee shareecada iyadoon la kasban aqoon dhaeystiran laga leeyahay kitaabka iyo sunnada rasuulka (scw).


5- Sh. Daaha Alcalwaani (dha: 1354h/1935m) ayaa isuguna Quraanka indha- indheeyey si u koobo waxa uu ku tilmaamey ujeedooyinka sare ee shareecada oo uu ku sheegey iney yihiin: "Towxiidka Alle, nadiifinta nafta iyo camiridda dhulka". Wuxuuna haattan ku howlanyahey cilmi baadhiyo uu ku faahfaahinayo mid walboo ka mid ah ujeedooyinkaas.


Ujeedooyinkaa aan kor ku soo xusney oo dhan waa aragtiyadii u ifbaxey culuma casrigan oo isku dayey wanaajinta shareecada iyo cusbooneysiinteeda, iaydoon cidina ku andacoon kareynin in qaab-qeybinta danbe iyo tii horeba iney tahey qudha muraadkii uu Alle shareecada ka

lahaa. Hadaan abuurka Alle u fiirsanana kama heleyno xariiqyada, goobaabinta iyo khariidadahan ay culumadu fahankooda ku muujinayaan, taasood sadarro kadib arki doonto. Xariiqyada, khadadka iyo calaamadaha lagu sharaxayo culuumta kala duwan iyo qeybaheeda waxaa sameystey dadka si ay fahmaan cid kalena u fahansiiyaan. Sidaa darteed waxaa laga fahmi karaa shaxahan kala duwan ee lagu sharaxayo qeybaha ujeedooyinka shareecada iney aad u baaxad ballaadhanyihiin, caalim kastana uu u qeybiyo una sharaxo sida fahankiisu yahay. Argtiyada laga qabo baaxadda iyo heerarka ujeedooyinka shareecada een kor ku soo xusney waxaa nooga cad iney ujeedooyinka shareecadu yihiin waxa uu higsanayo caalimku marka uu dajinayo fahankiisa shareecada ama uu cusbooneysiinayo fahanka laga qabo diinta iyo axkaamteeda, iyadoo marna laga tagi Karin aasaaska ah in ujeedooyinka shareecada laga dheehanayo *nusuusta* Quraanka iyo sunnada rasuulkiisa (scw). Hadaba isu keenida *nusuusta* Quraanka iyo sunnada iyo baahida casrigan waxey siineysaa cilmiga “ujeedooyinka shareecada” ahmiyad ballaadhan.






Mabaadii'da caalamiga
Axkaam faahfaahsan
Axkaam faahfaahsan
Axkaam faahfaahsan


Ujeedooyinka good
Qaar ka mid ah ujeedooyinka
Ujeedooyin gaar ah

## Dadaalkii Saxaabadu u galeen fahanka ujeedooyinka shareecada

Fikradda ah in la baadho ujeedada iyo muraadka laga leeyahey amarrada shareecada ee ku soo arooraya Quraanka iyo sunnaha rasuulka (scw) waxey billaabatey wakhtigii saxaabada, taana waxaan ka arki karaa dhacdooyinkan soo socda:

*1*- Dhacdadii salaadda casar ee caanka aheyd; taasoo uu ka waramayo xadiis qaabab kala duwan loo soo wariyey oo ahaa inuu nabigu amrey asxaabta markii loo socdey reer Banii Qureyda, nabiguna amar ku bixiyey ineyna cidina salaadda cassar ku tukannin meel ka sokeysa reer banii Qureyda, waxaana dhacdey in waqtiga salaadda cassar uu gabagaba istaagey iyadoon asxaabtu gaadhin reer *Banii Qureyda*, markaa waxaa dhacdey iney saxaabadu is khilaafeen oo laba arati kala raaceen: qeybi waxe ku adkeysteen ineyna salaadda tukan ilaa ay gaadhaan halkii loo socdey salaadduba ha tagtee! Qeyb kalena waxey go'aansadeen iney tukadaan ooynan waqtiga dhaafin. Qolada hore waxey daliishadeen hadalka nabiga oo war cad ah: "midkiinnuna yuunan salaadda cassar ku tukannin meel aan reer banii Qureyda aheyn", kuwa kalene waxey daliishadeen ujeeddada, oo waxey yidhaahdeen nabigu wuxuu u jeedaa ha habsaamina oo horey u gaadha meeshaan u socono. Nabiguna (scw) ma canaanannin labada kooxood midnaba, oo dadaalkoodii iyo fahankoodii ayuu ansixiyey. Hase yeeshee waxaa la yaab leh mid culumadii danbe ka mid ahaa (Ibnu Xasmi) oo canaantey mid ka mid labada kooxood ee nabigu ansixiyey, wuxuuna yidhi qolada waddada ku tukatey waxaa la haboonaa iney dulqaataan ilaa ay tagaan halkii loo sheegey, habeen badhka kadibna ha gaadheenee!

*2*- Dhacdo kale waxey aheyd mid laga garan karo qotta-dheerida fahanka asxaabtu ay ka fahmayaan hadalka rasuulka (scw) ujeedooyinka shareecada, taasina waxey aheyd dhacdadii ku saabsaneyd dhulka la jihaadka lagu xureysanayo ee waqtigii cumar (akn). Darajada cumar ibnu khadaab iyo la tashiga uu asxaabta la tashanayo si uga midha dhaliyo dadaalka uu ku bixinayo fahanka diinta waxey qiimo weyn u kordhineysaa natiijooyinka uu ka gaadhayo dadaalkaas. Nuxurka dhacdadaasina wuxuu ahaa iney saxaabadu ka dalbeen Cumar (akn) inuu u qeybiyo dhulka cusub ee lagu soo darey dowladda islaamka oo ku yaalla Massar iyo Ciraaq maadaama ay ka mid yihiin qaniimada dagaalka, waxey daliishanayeen aayadaha cadcad ee sheegaya iney qaniimada loo qeybiyo dadkii dagaallamey. Laakiin Cumar wuu diidey inuu magaalooyin iyo gobollo idil saxaabada u qeybiyo, wuxuuna cuskanayey aaydado macna guud xanbaarsan (كي لا يكون دولة بين الأغنياء منكم) “si aynan ugu dhex wareegin hantidu maal qabeennada oo kaliya”. Cumar iyo intii la aragtida aheydba waxey u fahmeen aayadaha ka hadlaya qeybinta qaniimooyinka iney ku saabsanyihiin qeybo ka mid ah ujeedooyinka shareecada oo dan ka leh “isku soo dhaweynta heynta dhaqaale ee dabaqadaha bulshada” sida maanta loo yaqaano.

*3*- Tusaalaha kale waa mid fahan qotte dheer leh, wuxuuna yahey kii uu Cumar ku joojiyey xadka xatooyada-gacan goynta-sanadkii abaarta darani ka dhacdey Madiina, wuxuuna fahmey in fulinta cuquubada xatooyada waqtigan ay gaajadu halaag dadka gaadhsiisey aynan xaqiijineynin ujeedadii laga lahaa oo ah:

cadaalad iyo reebanaan, wuxuuna fahmey in ilaalinta mabda'aasi ka weyntahay fulinta cuquubadaa gaarka ah.

*4-* Tusaale kale waxaan ka arkeynaa fahan Cumar ibnul khadaab, taana waa markii uu ka joogsadey fulinta xukun xadiiska rasuulka(sw) oo si cad u sheegaya in askariga jihaadka galaayi uu leeyahaey qaniima ahaan qofka uu dilo wixii uu wato, Cumarna(akn) wuxuu go'aamiyey askarigu inuu qaato shan meelood meel (1/5) markey qaniimadu qiimo weyn yeelato, taana wuxuu ku cileeyey mabda'a sinaanta iyo in hantida guud la kobciyo markey ay umaddu u baahantahey.

*5-* Tusaale kaloo tilmaamaya fahanka Cumar(akn) hadaan milicsano waxuu amrey in sakada la bixiyo fardaha, iyagoon ku jirin xoolihii/nicmooleydii Nabigu(scw) tiriyey in laga sakeeyo, hase yeeshee Cumar (akn) wuxuu arkey samankiisii fardaha oo aad u qaaliyoobey hanti bandanna ku fadhiya, sakadana wuxuu u fahmey ujeedadeedu iney tahay gargaar bulshadeed iyadoo uunan dhib u arag nooca hantiyeed ee laga bixinayo gargaarka, dadkuse xilligii waxey fahansanayeen in lagu ekaado noocyada xadiiska lagu sheegey.

Waxaa xusid mudan in dhamaan madaahibta fiqhigu ay ka hor jeedo ballaadhinta noocane la balaadhinayo noocyada xoolaha ay sakadu ku waajibeyso marka laga mad-habta xanafiga; taasna waxaa ka cad in fiqhiga soo yaalka ahi uu tixgaliyo oo kaliya macnaha muuda ee daliilka. Ibnu xasmi oo ah culumada ka ugu daahir-raac badan –macnaha muuqda ee kalimadaha uun raaca-ayaa wuxuu qabaa ineynan sakadu ku waajibin wax ka baxsan sideed nooc oo xoola ah, kuwaasoo ah: "dahabka, qalinka, qamadiga, heedda, timirta, geela, lo'da iyo riyaha" wuxuuna

yidhi: intaa umbaana xadiiska lagu sheegey wixii ka baxsanee midho iyo dalag beereed ah, fardo, addoomo, malab iyo badeecadaha ganacsiga sako laguma leh. Hadaba fahankan oo kale intee in la eg buu hey'adda sakada dakhli tirayaa, iney dowrkeeda cadaalad iyo is kafaala qaadidda bulshadeed guda

tana ka hor istaagayaa!

Isagoo ka duulaya manhajka "u fiirsashada ujeedooyinka ka danbeeya axkaamta" ayuu Sh. Yuusuf Alqardaawi ka hor yimid ra'yiga loo badanyahay ee ah in "sakadu ku waajibto oo kaliya noocyadii xadiiska lagu sheegey". Kadib markii uu aad u baadhey mowduuca sakada qoreyna kitaabkiissisii qiimaha badnaa ee ku magacaabey "fahanka sakada :فقه الزكاة" ayuu wuxuu yidhi: "xoolo walba oo kobca sako waa laga bixin… sakada waxaa loo jideeyey in lagu daboolo baahida dadka saboolka ah, masaakiinta, dadka qaameysan iyo socotada, sidoo kale in danha guud ee mulimiinta lagu oogo, sida jihaadka iyo soo dhaweynta quluubta dadka aan islaamin… waxaan la maleyn Karin in sharcigu u qasdey inuu culeysku fuulo qofkii haysta shan nee foo geel ah, ama 40 neef oo adhi ah, ama 5 ***wusqi*** oo heed ah, kadibna uu cafiyo hantiilayaasha waaweyn ee mulkiya warshadaha iyo daaraha waaweyn, amaba dhakhaatiirta, looyarada, shaqaalaha iyo xirfad layaasha heli kara maalintiiba waxa uu dhaqi geelluhu, adhiiluhu iyo beeraleydu sanado

Waxaan soo qaadaney tusaalooyin ku filan caddeynta ujeedadeena; taasoo ah inaan if bixino marxaladaha uu soo marey cilmiga "ujeedooyinka shareecada" iyo horumarka la gaadhsiiyey. Waxaa xusid mudan oo kale in u fiirsashada

macnaha iyo ujeedada ka danbeysa xukun walboo shareecada ah aan la awoodin, siiba qeybta ***cibaadaatka.*** Albukhaari ayaa wuxuu wariyey inuu Cumar(akn) xilligii uu talada hayey yidhi: "maxaa loo rugucleyn oo garabka loo muujin iyadoo Alle uu islaamka sarreysiiyey, gaalnimada iyo ehelkeedana hooseysiiyey" wuxuuna u jeedaa rugucleyta seddexda goor ee dawaafka u horreysa, ta sacyiga dhexdeeda ah iyo garabka midig oo la qaawiyo seddexda wareeg ee dawaafka u horeeya, taasoo uu nabigu(scw) amrey in la sameeyo si loo muujiyo xooga muslimiinta markii Makka la xoreeyey; maadaama ay mushrikiintu shaaciyeen in xanuunada Madiina ay muslimiinta jilciyeen. Laakkin haddana wuxuu yidhi: "ka tagi meyno wax aan sameen jirrey waqtigii Nabigu(scw) uu joogey. Sidaasuuna Cumar(akn) u kala saarey "cibadaadka" iyo "mucaamalaadka".

Imaamu shaadibina markuu yimid wuxuu kala saarey labada arimood oo wuxuu yidhi: "cibaadaadka waxaa assal u ah inaan la baadhin lana ogaan Karin ujeedada ka danbeysa, loona dhaqaaqin ilaa amar laga helo Alle iyo rasuulkiisa; maxaa yeeley caqligu ma hindisi karo cibaadaadka. Wixii caadooyinase waxaa assal u ah, in loo fiirsado xikmadda ku jirata iyo danta laga leeyahay, waxaana bannaan in wixii la rabo la iska caadeysan karo(lagu dhaqmi karo), daliil sharci ah oo diida mooyee".

Asaaska guud ee shareecaduna waa in cibaadaadku ahaadaan wax sugan oo muslimku sideeda u qaato ama la raaco sidey Nabiga (scw) iyo Asxaabtuba sameeyeen, halka ay na bareen inaanaan wixii dhaqan ah ama mucaamalaad ah sidooda aanaan u

qaadanninee loo fiirsado ujeedada lga leeyahey markaan dhaqan galineyno.

## Aragtiyadii ugu horeeyey ee ujeedooyinka shareecada

Aragtida ujeedooyinku iyo qeyb-qeybinteedu horumarkeedu wuxuu billowdey waqtigii asxaabta kadib, hase yeeshee aragtida ujeedooyinku ee u taalla sida aan maanta arkeyno maynan habeysmin culumada ***usuulka*** ee danbe inteynan iman ka hor, taasoo ah inta u dhaxeysa qarnigii 5aad iyo siddeedaad ee hijriyada. Taasina waa waxa aan ku sharrixi doono faqradahan soo socda. Hase yeehee waxaa lagama maarmaan ah inaan ogaano in seddexdii qarni ee hore gudaheed ee jirtey uun fikradda ujeedooyinku in kastoo ay magacayo kala duduwan ee ku magacowneed sida: xikmada, cilladda, munaasabadda, danta iyo macnaha ay ku magacaabi jireen culumada ***Usuulka*** iyo madaahibta fiqhigu. Waxaa ka mid ah tusaale ahaan qiyaaska iyo noocyadiisa iyadoo la adeegsanayo axkaamta lala soo baxo, ***istixsaanka*** (sheyga oo la wanaajisto) maslaxadda oo la raaco. Laakiinse cilmiga ujeedooyinka shareecadu si madaxbanaan uma soo bixin, fiiro gaar ahna lama siinin ilaa dabayaaqadii qarnigii 3aaad ee hijriyada, waqti danbe oo ah qarnigii 5aad waxaa soo baxdey aragtida "heerarka daruurooyinka" oo uu soo saarey Imaam Aljuweyni (dhi: 478h/1085m). Hadaba si kooban aan u soo bandhigno tijaabooyinkii ugu horeeyey ee lagu horumarinayey aragtiyadii ujeedooyinka shareecada ee u dhaxeeyey qarnigii 5aad iyo siddeeedaad ee hijriyada.

1- Alrimiyu alxakiim (dhi: 296h/ 908h): wuxuu lahaa kitaab uu ku magacaabey "salaadda iyo ujeedooyinkeeda" waxaana la

ogyahey kii ugu horeeyey oo gaar ku ah mowduuca ujeedooyinka, cinwaankiisana waxaa ku soo aroorey sidaan aragno ereyga “ujeedooyin”. Kitaabku wuxuu soo qaadanayaa isagoo isticmaalaya qaab suufinimo oo cad xikmadaha iyo siraha ruuxiga ah ee ku jira shaqooyinka salaadda oo dhan. Wuxuuna leeyahey tusaale ahaan: shaqooyinka salaadu waxey u kala duwanyihiin hadba sidey xaaladda adoonku u kala duwantahey: soo joogsiga waxuu bixinayaa baxsashada, qiblada oo loo jeedsadana waxaa ku baxaya dhabar jeedinta, takbiirtana waxaa ku baxaya kibirka, ammaanta Allena waxaa ku baxaya qafladda, rukuucdana waxaa ku baxaya qalbi engeyga, sujuudana waxaa ku baxaya danbiga…”. Xakiim tirmidi wuxuu kaluu leeyahay kitaab kan u eg oo uu ku magacaabey “xajka iyo sirihiisa”.

2- Abuu zeyd Albalkhii (dhi: 322h/933m): kitaabkiisuna wuxuu ku magacnaa “caddeynta cilladaha diinta” waana kitaab la ogyahey kii ugu horeeyey oo ku saabsan ujeedooyinka shareecada qeybteeda *mucaamalaadka* wuxuuna ku soo qaatey ujeedooyinka ka danbeeya axkaamta shareecada. Sidoo kale wuxuu qorey kitaab kaloo uu ku magacaabey “masaalixda jidhka iyo nafta”, wuxuuna kaga sheekeeyey sida dhaqanka iyo axkaamta islaamkuba ay u wanaajiyaan caafimaadka jidhka iyo ka ruuxdaba.

3- alqaffaal alshaashii (dhi: 365h/975m): qoraal gacmeedkii ugu da’a weynaa een ku arkey daartii kutubta masaarida, wuxuu ahaa kitaabii uu qorey ***Alqaffaal*** ee ku magacawnaa “wanaagyada shareecada”. Wuxuuna ku billaabey hordhac ka qaatey labaatan bog, kadibna wuxuu u qeybiyey fasalladii la yaqiiney ee kutubta fiqhiga, laga bilaabo: dahaaro, weyso-qaadasho, salaad ilaa

dhamaadka cutubyada kutubta fiqhiga ee la yaqaano. Marka hore wuxuu si kooban u sheegayaa xukunka fiqhiga ah, kadibna aad ugu ballaadhanayaa ujeedooyinka xukunka iyo xikmada ka danbeysa. Qoraal gacmeedkaasina waa mid aad u muuqda, waana ugu dhawaan 400 oo bog. Bogga ugu danbeeyana waxaa ku yaalla taariikhdii qoraalka kitaabku dhamaadey; taasoo ah 11 *Rabiicul awal* 358h/7/1/969m. Axkaamta fiqhiga eek u jirta kitaabkana waa mid aad u ballaadhan, inkastoo uu u soo qaadanayo mid mid, sheegeyninna xidhiihdka ujeedo ee ka dhaxeeya. Hase yeeshee kitaabu aragti horumarsan oo ku soo biirtey cilmiga ujeedooyinka shareecada.

Sheekha la yidhaahdo C/naasri Al-luqaati ayaa wuxuu baadhitaan iyo xaqiijinba ku sameeyey qeyb ka mid ah qoraal gacmeed kaloo uu leeyahay Alqaffaal (wanaagyada), waxeyna aheyd qoraalkii uu u gudbiyey Jaamacadda ***weels*** 2004tii, si u helo darajada aqooneed ee ph D. ***Maw'il Ciaddiin,*** oo ahaa hagihii qoraalkaas oo ka sheekeeyey ahmiyadda kitaabka iyo dadaalkii uu ka geystey *Fiqhiga* islaamka, ayaa wuxuu yidhi: sida uu u arko AlqafFaal al-shaashii ahmiyadda amarrada shareecadu waxey u noqonayaan xikmaddooda oo in badan shareecadu caddeyso. Tusaale waxaa u ah,  xaaraantinnimeynta khamrada, taasoo uu sharcigu ka eegayo iney tahay waddo uu shaydaanku cadaawadda ku faafinayo; taasoo Iyana ku kallifeysa ka tagidda dikriga Alle iyo salaadda…waxaan shakki ku jirin in al-shaashi uu aad ugu dadaaaley horumarinta aratiyada fiqhigee mad-habtiisa shaaficiyada markii uu soo bandhigayey aragtida axkaamta fiqhiga iyo asbaabta ka danbeysa.

Sidaasey "macnayaasha" iyo "sababaha" uu Alqaffaal uu ka dhigayo aasaaska fahanka, u yihiin aragtiyadii hore ee ujeedooyinka shareecada, inkastoo ay ku dhasheen gudaha mad-habta fiqhiga shaaficiga. Waxaa kaloo xusid mudan in horumarinta uu ku sameeyey fahanka daruurooyika, ujeedooyinka siyaasadda iyo heerarka karaamada, waxey u gogol xaadheen, waxtarkii Al-juweyni iyo Al-qazaali ay ku soo kordhiyeen mad-habta shaaficiga iyo aragtiyadii ujeedooyinka shareecada si isku mid ah, waxeyna ka hor mariyeen dhinaca erey-bixinta aan qaarkood wax ka soo sheegney, si faah-faahsanna aan u soo bandhigi doonno mar dhaw.

4- Ibnu Baabaweyh A-qummii (dhi: 381h/991m): dadka qaarkood ayaa waxey u heystaan in diraasadaha ku saabsab ujeedooyinka shareecada eek u koobnaayen culumada madaahibta fiqhiga ee sunniga ah ilaa qarnigii labaatanaad. Hase yeeshee kitaabkii dhameystirnaa ee ugu horeeyey, gaarna u ahaa diraasada ujeedooyinka shareecada waxaa qorey Ibnu baabaweyh oo ahaa *Faqiih* weyn oo shiici ah, qoreyna qarnigii afaraad ee hijriyada, wuxuuna ka koobnaa 335 fassal oo ku saabsan ujeedooyinka uun. Kitaabka oo magaciisu yahay "cilladaha shareecada" wuxuu soo bandhigayaa, sharaxaad caqli ah oo ku saabsan rumeynta Alle, anbiyada, ***qeybka*** iyo qeybaha kalee iimaanka. Wuxuu kaluu sharraxayaa xikmadaha ku jira salaadda, soonka, xajka, sadaqada, u sama-falka waalidka…iwm.

5- Al-caamiri (dhin: 381h/991m): qormadii ugu horreysey ee la yaqaano, kuna saabsan aragtida ujeedooyinka shareecada waxaa qorey Alcaamirigii falsafad yaqaanka ahaan, wuxuuna qorey kitaab uu ku magacaabey "ogeysiinta darajooyinka

islaamka”. Wuxuuna ka qorey: diididda naf-dillidda… qaadashada xoolaha.. sinada… sharaf-dhaawicidda… iyo riddoobidda(diin-ka baxa). Hase ahaate qoraalka Alcaamiri wuxuu ku koobnaa cuquubadaha xad-gudubka ee diinta islaamka. Sidaasseyna u horu-marin qoraallada ku saabsan heerarka daruurooyinka ujeedooyinka shareecadu, ilaa qarnigii shanaad ee hijriyada. Kadibna wuxuu horu markeedu meel sare gaadhey qarnigii seddeedaad (marka laga reebo horumarradii la sameeyey qarnigii labaatanaad).

## Cutubka Labaad

## Imaamyda Cilimga Ujeedooyinka ee Qarnigii Shanaad ilaa Siddeeedaad

Qarnigii shanaad ee hijriyada waxaa dhashey wax uu ku tilmaamey Sh. Cabdallah bin bayah "falsafaddii sharci dajinta islaamka" waxaa qarnigaa if baxey in fatwooyinkii baahsanaa ee hore sidooda loo raaco aynan ka jawaabi Karin baahiyada cilmi ee ay keeneen mucaamalaadka ballaadhan ee ka dhashey is dhex-galka bulshooyinka. Si looga jawaabo baahiyada cusub waxaa soo baxdey aragtida "masaalixda furan", waana masaalixda iyo manaafacaadka cusub ee horey loo aqoon, caalimkuna wax kutubtii hore ay tidhi oo toos uunan waxba ka arkeynin. Aragtidaasi waxey dabooshey baahidii ay dabooli kari waayeen fatwooyinkii sidooda loo raaci jirey. Waxey kaloo dhalisey iney kobocdo fikradda "ujeedooyinka shareecada" intii u dhaxeysey qarnigii shanaad iyo siddeedaad ee hijriyada. Culumadii ugu muhiimsaneyd ee qeyb libaax ka qaadattey koboca fikraddan waxaa ka mid ahaa: Abul-macaalii Al-juweyni, Abuu-xaamid Al-gasaali, Al-cissi Ibnu Cabdussalaam, Shihaabuddiin Al-qaraafii, Shamsuddiin Ibnul-qayyim, kooda ugu qeybta weynaana waa : Abii-Isxaaq Al-shaadibii.

## Imaa Al-juweyni iyo “baahiyada guud”

Abul-macaalii Al-juweyni (dhi: 478h/1085m) wuxuu qorey kitaabkiisa “*alburhaan fii usuulil fiqhi*” waana kitaabkii ugu horeeyey ee soo bandhiga heerarka daruurooyinka, isagoo u dhigey qaab u eg qaabka maanta inna horyaalla. Wuxuuna soo bandhigey shan heeer oo kala ah:

1- Waxyaalaha la xidhiidha daruurooyinka sida qisaaska oo kale
2- Wixii la xidhiidha baahiyada guud, sida wax kala kireysiga oo kale
3- Ku dhaqan akhlaaqda wanaagsan iyo ka tagidda lidkooda, sida dahaarada.
4- Wixii sunnooyin ah oo ay diintu doorbiddey.
5- Waxyaabaha cilladooda aan si cad loo garan Karin, kuwaasoo wax yar ah.

Waxyaabaha oo soo bandhigey waxaa ka mid ahaa, in ujeeddada guud ee shareecadu tahay: “ilaalinta caqiidada dadka, naftooda, miyirkooda, xoolahooda iyo cawraadkooda. Waxaanan u arkaa kitaabka Al-juweyni ee kale "غياث الأمم" inuu yahay koror muhiim ah oo ku soo kordhey cilmiga ujeedooyinka shareecada, inkastoo uu inta badan ka hadlayo siyaasadda sharciga ah. Wuxuuna cadeeyey cabsida uu ka qabo iney dhammaadaan aqoonyahannada shareecada iyo baraayasha madaahibtu maalin maalmaha ka mid ah, wuxuuna raaciyey: “kaba soo qaad iney dhacdo” isagoo ka duulaya ka soo qaadkaas, waxaa uu qaatey iney axkaamta shareecadu ku dhisantahey "usuuhsha go’an” een shakiga, maleynta iyo cadeymaha kala duwan aynan soo gali karin. Wuxuuna raaciyey waxyaabaha uuna shakigu gali karini

iney yihiin “ujeedooyinka shareecada” ee abwaabta fiqhiga ee kala duwan, sida ujeedada raalli ahaanshaha labada qof ee wax kala iibsaneysa, ujeedada gargaaridda dadka baahan ee sakooyinka laga leeyahay, iyo ujeedada fududeynta marka laga hadlayo nijaasooyinka … iwm. Sida aan qabona kitaabka Al-juweyni “غياث الأمم” waa aragti dhameystiran oo lagu cusbooneysiin karo, dib loogu habey karo fiqhiga islaamka, iyadoo la cuskanayo ujeedooyinka shareecada.

## Imam Al-gasaali iyo Tartiibinta “Daruurooyinka”

Al-gasaali oo (dhi: 505h/1111m) ahaana ardeygii Al-juweyni ayaa wuxuu horumariyey aragtidii macallinkiisa, sida ka muuqatta kitaabkiisa “*almustasfaa*” wuxuuna u tartiibiyey daruurooyinkii uu soo bandhigey Al-juweyni oo sidan: diinta, nafta, caqliga, taranka, maalka. Waana qofka hidisey ereyga “ilaalinta” marka laga hadlayo daruurooyinka. Isagoo aad u faahfaahiyey falanqeynta daruurooyinka, hadana muunan gadhsiinin daraja xujeysiga, wuxuuna ku magacaabey iney yihiin “maslaxad la maleynayo”, sababtoo ah; daruurooyinku waa wax laga dheehdey kitaabka ee ma darjada adillada kalee sharcigu sheegey. Iyada oo taasi jirto ayaa hadana Al-gasaali u adeegsadey “ujeedooyinka” shareecada” asaas lagu dul dhiso axkaamta shareecada. Wuxuuna yidhi maslaxaddu marka loo eego markhaatiga shareecada waa saddex nooc: nooc sharcigu ka markhaati Kacey tixgalinteeda, nooc uu sharcigu ka markhaati kacey tixgalin la’aanteeda, iyo nooca seddexaad oon waxba ku soo aroorin. Hadaba ta sharciga daliil looga heley waa la xujeysan karaa, waxaana loo raacayaa qiyaaska oo ah in xukunka laga dheehdo fahanka ***naska*** ***i***yo ***ijmaaca…*** tusaalena waxaa u ah:

xaaraantinnimeynta wax walboo maan dooriye ah, ku la cabo iyo ku la cunaba, waxaana looga qiyaas qaadanayaa khamrada, maxaa yeeley; waxaa loo xaaraantinimeeyey ilaalinta caqliga oo ku xidhanyahey waajibinta axkaata shareecadu… ujeedada shareecadu aadamaha ka leedaheyna waa shan, oo ah: ilaalinta diintooda, naftooda, caqligooda, tarankooda iyo maalkooda. Wax walbooy ku jirto ilaalinta arrimahan waa maslaxad, wax walboo keenaya waayitaankoodana waa dhibaato in laga hor tago ah si loo ilaaliyo maslaxaddii.

Wuxuu kaluu hindisey Al-qasaali ***qaacidada*** lagu tartiibinayo heerarka daruurooyinka, taasoo uu yidhi iney waajib tahey in la hormariyo baahi ahaan ugu sarreysa kuwa kale, marka ay dhaqan galitoodu natiijooyin kala duwan keeneyso.

## Cissaddiin ibnu Cabdissalaam iyo "Xikmadda ka Danbeysa Axkaamta"

Cissaddiin Cabdussalaam (dhi: 660h/1209m) wuxuu qorey laba kitaab oo yaryar oo xidhiidh la leh ujeedooyinka shareecada, isagoo xooga saaraya "xikmada ka danbeysa axkaamta" labada kitaabna waxey kala yihiin "*maqaasidissalaat***"** iyo "*maqaasidisoom***".** Inkastoo wax qabadkiisa weynee ku saabsan horumarinta aragtida ujeedooyinka shareecada wuxuu si fiican u muuqdaa kitaabkiisa kale ah "*qawaacidul axkaam fii masaalixil anaam*".

Cissaddiin Ibnu Cabdissalaam baadhitaanka qottada dheer ee ku sameeyey fahanka dheefta iyo dhibta la socota fulinta axkaamta shareecada iyo fulin la'aanteeda waxaa u dheeraa, inuu isku xidhey axkaamta shareecada iyo xikmadda ka danbeysa, tusaale

ahaana wuxuu qorey waxaa ka mid ahaa inuu yidhi: “qofkii u fiirsada ujeedooyinka shareecada iyo sida dheef ugu soo jiidayaan dhibna uga difaacayaan, wuxuu ogaanayaa iney haboon tahay maslaxaddaa ilaalinteedu, mafsadadana ka fugaashaheedu qasab tahay, yeynaba ku soo aroorin daliil gaar ah, fahanka shareecada oo kali ihi wuu ku filanyahay.

## Imaamulqaraafi iyo “Anwaacu Tasurrufaatinnabiy”

Waxqabadkii uu ku soo kordhiyey Al-qaraafi (dhi: 684h/1285m) aragtida ujeedooyinka shareecada waxey soo ifbaxdey sidan ay maanta u muuqato markii uu kala saarey falalka Nabiga (scw) iyadoo laga duulayo muraadkii uu nabigu (scw) ka lahaa. Wuxuuna ku yidhi kitaabkiisii *Al-furuuq:* waxaa kala duwan falalka uu nabigu (scw) uu sameynayo isagoo gar-soore ah iyo isagoo mufti ah (gaadhsiinta farriinta Eebe) … falalkiisa noocyadaa ahi raadka ay shareecada ku leeyihiini wey kala duwanyihiin… wax walboo uu yidhaahdo ama sameeyo isagoo ay ka tahay gudbinta farriinta Alle, waa xukun guud, amase diridda ciidamada, bixinta xoolaha, magacaabidda garsoorayaasha, maamulayaasha , qeybinta qaniimooyinka iyo galidda heshiisyadu waa fal uu u guttey mas’uul ahaane si kale ma aha.

Sidaasuuna u ballaadhiyey ***Qaraafi*** macnaha ujeedooyinka shareecada uu wuxuu ka dhigey mid ku xidhan waxa loo jeedo, amaba wuxuu nabigu uga gol lahaa falalkiisa. Ibnu caashuur (dhi: 1976) ayaa kala duwanaanshahan Qaraafi sheegey ku darsadey qeexitaankiisii uu qeexey ujeedooyinka shareecada sidaan arki doono.

Wuxuu kaluu Qaraafi wax ka qorey “furidda wadooyinka lagu gaadhayo masaalixda”. Tanina waa ballaadhin kaloo muhiim ah oo la ballaadhiyey aragtida ujeedooyinka shareecada, maxaa yeeley; wadooyinka xumaan loo adeegsanoo dhan waa in la xidhaa, kuwa wanaag lagu gaadhayana waa in la furaa. Hadaba Al-qaraafi kuma koobin naftiisa dhinaca xun ee “xidhidda wadooyinka” sidaan dib uga faahfaahin doonno.

### Imam Ibnul Qayim iyo “Xaqiiqada Shareecada”

Ibnul qayim (dhi: 748h/1347m/) wuxuu ahaa ardeygii Ibnu Teymiya (dhi: 728hm), wax qabadkiisii ku saabsanaa xaga aragtida ujeedooyinka shareecada waxaan ka dheehan karaa diraasooyinkii u ku sameeyey wuxuu ku magacaabey xeeladaha fiqhiga, kuwaaso ah xeelado ka horjeeda ujeedooyinka. Xeeladaha fiqhiguna waa heshiis xaaraan ah, sida: ribada, iyo laaluushka, qaab sharciyeysanba ha loo dhigee, sida qaab iib, deeq, ama wixii la mid ah. Qoraalkiisa wuxuu ku yidhi Ibnul qayim:

Waxyaalaha ku tusuniya baadilnimada xeeladaha iyo xaaraantinimadooda, inuu Ilaahey waajibaadka waajibiyey xaaraantana xarimey, maadaama ay xambaarsanyihiin masaalix aduun iyo aakhiraba… adoonkuna markuu u xeeladeysto xalaaleynta xaaraanta iyo gudasha la’aanta waajibaadka iyo joojinta fulinta sharciga Alle wuxuu diinta Alle ka dhex wadaa fasaad dhinacyo badan leh: ka hore, wuxuu baabi’inayaa ama burinayaa xikmada ilaahey uu arinkaa u jideeyey, ta kale arinkan uu ka xeeladeysanayo uma jeedo qofku ee dantiisu waa wax

kale oo arin xaaraan ah. Qofka ribada cunaya oo kale, ujeedadiisu ma aha muuqaalkan sare ee iibka, sidoo kale qofka xoolihiisa u dhiibaya qof uuna siineynin ee ujeedadiisu tahay faralka inuu fulin waayo, ujeedadiisuna waxey tahey waajib ka cararee ma aha xoolo bixin… shareecaduna quluubta waxey u tahay waxey cuntada iyo dawadu jidhka u yihiin, taasina waxey ku suuroobi markii xaqiiqadeeda la raaco ee ma aha muuqaalkeeda in la xeeladeysto. Wuxuuna ku soo gunaanadey Ibnul qayim dariiqaddiisa fiqhiga iney ku dhisantahay "xikmadda iyo masalaxadda aadamaha", taana waxaan ka arkeynaa weedhihiisan adag ee soo socda:

Shareecadda asaaskeeda iyo waxey ku dhisantahay waa maslaxada adoomada aduun iyo aakhiraba, dhammaanteedna waa cadaalad, naxariis, xikmad iyo maslaxad, arin walboo cadaalad darro ah, ama naxariista ka baxsan, maslaxad iyo xikmadna aan ahayn, shareecada ka mid ma aha, si khaldanba ha loogu aaneeyee!

Faqraddan aan halkan ku soo qaadaney waxay aniga iila muuqataa iney tahay qaacido lagama maarmaan ah oo ka caawineysa dadku iney fahmaan dabeecadda sharci dajinta islaamka. Waxaan halkan ka arkeynaa ujeedooyinkii shareecada oo meeshoodii saxda ahayd dagey, markii loo arkey iney tahay "***asaaskii***" , ama lagu tilmaao "***falsafaddii sharci dajinta islaamka"*** sida casrigeena maanta loo yaqaano**.** Sidaasina waa siduu Imaau shaadibi weedhihiisa cad cad uu ku sheegey.

## Imaamu Shaadibi iyo Aragtidiisa Ujeedooyinku iney ka mid yihiin "Usuusha Shareecada"

Erayadii ujeedooyinka la xidhiidhey ee imaamu shaadibi (dhi: 790h/1388m) guud ahaan waa isla kuwii ay adeegsadeen Imaamul Juweyni iyo ardeygiisii Al-qasaali. Hase yeeshee waxaan aaminsanahay in kitaabkiisa "*almuwaafaqaat fii usuuli shariicah*" uu soo rarey aragtida ujeedooyinka shareecada seddex tallaabo oo muhiim ah.

1- Ka "masaalixda furan" ilaa "usuusha shareecada"

Ujeedooyinka shareecada kitaabkii Shaadibi ka hor waxaa loo arki jirey qeyb ka mid ah "masaalixda furan" loomana arki jirin iney iskood uga mid yihiin usuusha shareecada, waana tii aan soo tilmaaney. Imaamu shaadibi wuxuu kitaabkiisa qeybta ujeedooyinka shareecada uu kaga hadlayey kuna furtey aayado Qur'aan ah isagoo ula jeeda kuna cadeynaya in Ilaahey ujeedo ka leeyahay abuurka, diridda ergayaashiisa iyo soo dajinta shareecadiisa, sidaa darteed buu u arkey iney ujeedooyinku yihiin usuusha diinta, udubada shareecada iyo yoolasha guud ee tubta islaamnimada.

2- Ka "xikmada ka danbeysa axkaamta" ilaa "asaasyada axkaamta"

Shaadibi wuxuu cuskadey aragtida mudnaan-siinta macnaha guud ee ujeedooyinka, taasoo gaadhsiisey in "yoolasha guud" gaar ahaan markey yihiin daruuriyaadka, aan marnaba laga hor marin karin axkaamta gaarka ah. Mabda'aasi wuxuu ahaa, tallaabo muhiim ah oo lagaga guurey qaabkii soo jireenka ahaa ee mad-habta maalikiga - oo ah mad-habta shaadibi- lagaga

dhaqmi jirey oo ahaa in daliilka gaarka ah laga hor mariyo daliilka guud. Taana waxaa u dheer in Shaadibi uu u shardiyey aqoonta ujeedooyinka shareecada nabad qabka ***ijtihaad*** walboo la sameynayo.

3- Ka "maleynta" ilaa "hubaasha"

Shaadibi wuxuu aad ugu dadaaley in la adkeeyo marxaladda cusub ee uu soo gaadhsiiyey horumarka ujeedooyinka shareecada iyo mudaan-siinta heerka ay shareecada ka joogto. Kitaabkiisa wuxuu ku furtey soo aroorinta xujooyin uu ku sugayo "hubaanshaha" natiijada wax akhriska qottada dheer, isagoo cuskanaya falanqeeyeyna daliillo farabadan. Taasina waxey ahayd tallaabo manhaji ah oo cusub oo lagaga gudbey qaab-fikirkii hore ee laga dhaxley falsafadaha Giriiga, taasoo dhigeysey in natiijada akhriska qottada dheer ay tahay "malo" –waxaan la hubin-. Kitaabka Shaadibina wuxuu noqdey ***marjica*** ugu weyn oo ay u noqdaan culumada indha-indheysa **ujeedooyinka shareecada** ilaa qarnigii labaatanaad, inkastoo hindisihiisa ah in "***ujeedooyinku"*** noqdaan asaaska shareecada aan si ballaadhan loola qaadannin.

# Cutubka Seddexaad

## Dowrka ay Ujeedooyinku ku leeyihiin Cusbooneysiinta Islaamiga Casrigeenna Maanta

Ujeedooyinka shareecadu waxey ka mid yihiin qaababka ugu muhumsan ee uu cuskado fikirka islaamka ee damacsan dib u hufidda iyo cusbooneysiinta aragtida diinta. Waxaan shaki ku jirin in warbaahintu, gaar ahaan ta reer galbeedku, dhaliil ay ka bixiso nidaamka ama axkaamta shareercada islaamka, kuna andacoodaan in shareecada islaamku u baahantahey cusbooneysiin iyo wanaajin si ay ugu suubato shucuubta islaamka dhamaantood iyo muslimiinta laga tirade badanyahayba. Hase yeeshee waxaa hubaal ah, ololahaasi inuu yahay mid la isugu dayayo in la sameeyo islaam la socda hadba rabitaanka dadka iyo nidaamyada ku dhisan maskaxda aadamaha, ee bulsho, siyaasadeed oo ka fog mabaadii'diisa iyo danaha guud ee muslimiinta. Dawrka ay ujeedooyinka shareecadu ku leeyihiina arinka cusbooneysiinta waa dowr soo dhaweyn ah, maxaa yeeley; ujeedooyinka shareecadu waa falsafadda sharci dajinta islaamka, waxeyna udub dhexaad u noqon karaan cusbooneysiinta, sababtoo ah waxey ka dhasheen culuumta islaamiga ah lafteeda, waxeyna ku saleysanyihiin aragtida iyo fahanka islaamku ka qabo kownka iyo nolosha. Waxaanan isku dayi doonaa inaan qeybaha soo socda ku caddeyno ujeedada aan ka leenahay, taasoo mawduucan ka eegi doonta wajiyo kala duwan. Ugu horreyn waxaan soo bandhigi doonaa fikkirka islaaamiga ah ee casrigan, kaaso falanqeynaya fagaarayaasha ujeedooyinka shareecada marka loo qaato iney tahay "**mashruuc horumarineed**" iyo "xuquuqal insaanka", anagoo raaceyna dhismo ereyeedka cusub.

Marka labaad waxaan u gudbeynaa soo bandhigidda ujeedooyinka anagoo ku tilmaameyna iney tahay manhajka cusub ee cusbooneysiinta, gaar ahaan marka la kala saarayo yoolasha iyo qaababka.

Mar seddexaad waxaan soo bandhigeynaa caddeymo aan ku muujuneyno ahmiyadda ujeedooyinka shareecadu u leeyihiin cusbooneysiinta fahanka quraanka iyo sunnaha, kadibna waxaan baadhi doonaa manhajka ***ijtihaadka*** –dadaal bixinta- ee cuskanaya "**wadda furidda**" kaasoo ka duwan manhajkii hore ee ahaa "***saddu-daraa'ic"*** – waddo xidhid-, marka afaraadna ee u danbeeyana waxaan soo bandhigeynaa ujeedooyinka shareecada iyadoo ah mabaadii' ay heshiis ku wada yihiin madaahibta fiqhiga oo dhan, noqona karta madal-doodeed ay ku wada hadlaan diimaha kala duwani.

## Ujeedooyinka Shareecada iyo Mashruuca Horumarinta iyo Xuquuqda Aadamaha

Waxyaabaha ay culumada iyo indheer-garadka maanta ay ujeedooyinka shareecada ku horumariyeen waxaa ka mid ah: adeegsiga ereyada casrigan ee xidhiidhka la leh cilmigan, inkastoo ay diidanyihiin culumada qaarkood adeegsiga ereyga "casriga" marka laga hadlayo cilmiga ujeedooyinka shareecada. Haddaba waxaan soo bandhigeynaa qaar ka mid ah waxqabadyadaas:

Qoraalladii hore ee cilmiga ujeedooyinka shareecadu waxay u arkayeen "ilaalinta taranka" daruurooyinka shareecada islaamku xaqiijineyso mid ka mid ah. Taasina waxey soo if baxdey waqtigii uu Al-caamiri kaga hadli jirey isku dayadiisii hore ee uu tilmaami jirey "cuquubada ku xad gudubka

asturaadda” sidaan horeyba u soo sheegney. Waxaana dabadii yimid Imaam Al-juweyni oo horumariyey hadalkii culumadii ka horeysey ee ku saabsanaa “cuquubooyinka”, wuxuuna u horu mariyey waxa aan ku magaabi karo “aragtida dhowrsanaanta” dhowrsanaanta nafta iyo maalka sidaan horeyba u soo sheegney. Cuquubada ku dhaceysa qofka dhaawaca xishoodka, Al-juweyni wuxuu u arkaa iney ka mid tahay “ilaalinta cawrada”. Ereyga “ilaalinta taranka” se waxaa dhigey Imaamul Qasaali isagoo u arkey mid ka mid ah ujeedooyinka shareecada islaamka daruurooyinkeeda. Shaadibina wuxuu raacey ereygaa Al-qasaali sidaan horeyba u soo caddeyney.

Waxaa halkaa ka muuqata in billowgii qarnigii 20 naad culumadu ay guda-galeen siiba kuwa isku taxallujiya mawduuca ujeedooyinka shareecada iney horu mariyaan erey-cilmiyeedka “**ilaalinta taranka”** si uu uga mid noqdo aragtida “ilaalinta qoyska”. Tusaale ahaan Ibnu caashuur wuxuu cutub gaar ah ka dhigey “ujeedooyinka qoyska” kitaabkiisii “ujeedooyinka shareecada”.

Cilmi baadhayaasha qaarkoodna waxey u janjeedhaan in waxqabadka Ibnu caashuur uu yahay bandhig cusub oo uu ku sameeyey aragtida “ilaalinta taranka” qaar kalena waxey u arkaan aragti cusub oo baddaleysa tii hore. Si kastaba ha ahaate! waxaa cad in wax qabadka Ibnu Caashuur uu u furey culumada ka danbeysa waddo ay ku ballaadhiyaan baaxadda ujeedooyinka shareecada, sida sheikh Al-qardaawi oo si toos ah ugu darey “sameynta qoys wanaagsan” ujeedooyinka shareecada islaamka. Taana waxaa ka dhalatey in qoyskii loo arko aasaaka dhismaha bulshada, taasoo ka dhigneyn in meesha laga saarayo “cuquubada

ku xad gudbka asturka, ama in la dhaafayo “ilaalinta cawrada” ama la iloobayo “ilaalinta taranka”, balse waxaa loo jeedaa in lagu gaadho masaalixda gaar ahaaneed iyo ta wadareedba, xeyn-daabka dhismaha qoyska, taasaana ka wanaagsan. Waxaana markhaati ma doonto ah in ahmiyad-siintan arrimaha qoyska iney adkeneyso xuquuqda haweeneyda muslimadda ah, - taasoo u baahan adkeyn- markaan u fiirsanno xaaladaha maanta jira iyo xuquuqda oo ah mustaqbalka umadda, waxeyna ka ilaalineysaa dhamaantoodba xad gudubka iyo sharaf rididda. Ballaadhinta erey-cilmiyeedyada ujeedooyinka shareecaduna waxey shareecada u sahleysaa adeeg ballaadhan iney siiso qadiyadaha umadda ee casrigeena maanta.

Qaabka uu Ibnu Caashuur u bandhigayo fahanka ujeedooyinka shareecada wuu ka duwanyahay fahanka Al-caamiri oo u arka in masaalixda lagu xaqiijin karo fulinta cuquubooyinka, mana aha qaab uu u bandhigayo Al-qasaali oo ah “ilaalin” oo ah in bulshada laga ilaaliyo dhibaatooyinka iyo fasaadyada, balse fahankiisa iyo dadaalkiisu wuxuu ku wajahanyahay “qiimayaasha” iyo “nidaamyada”, labadana waa erey-cilmiyeed uu hindisey Ibnu Caashuur. Laakiinse Culumada qaarkood wey ku diidanyihiin in lagu soo daro cilimiga ujeedooyinka shareecada ereyada iyo fahanka cusub, sida: cadaaladda iyo xuriyadda, waxeyna door bidayaan in macnayaashani ku xirnaadaan aragtiyadii hore. Waxaanse qabaa inaan cabsi laga qaadin horumarinta aragtiyada ujeedooyinka shareecada, maadaama aragtiyada kaloo dhanba ay horumaraan.

Mawduuca kalee lagu magacaabo “ilaalinta caqliga” ilaa barya dhaweyd wuxuu ku koobnaa xaaraameynta maandooriyayaasha,

taana waa mid muhiim ah, hase yeeshee waxaa loo horumarin karaa casrigeenan, si uu u kulmisto “faafinta qaab fikirka cilmiyeysan” “socdaal aqoon raadin ah” “ka hortaga nolol dugaageed” iyo “ka hor taga hayaanka cuquusha wadamada islaamka”.

Sidoo kale mawduuca “ilaalinta sharafta” iyo “ilaalinta nafta” waxey Al-qasaali iyo Shaadibi agtooda kaga jireen heerka daruurooyinka ee ujeedooyinka shareecada islaamka, waxaana ka hadalka cuquubadooda kaga horeeyey Al-caamiri, sidoo kale Al-juweyni wuxuu soo bandhigey erey-cilmiyeedka “dhowrsanaanta nafta”. Fahanka “ilaalinta sharaftuna” wuxuu carabta agteeda ka taagnaa meel adag islaamka ka horba.

Nabiguna (scw) wuxuu cadeeyey in qof walboo Muslim ah, Muslimiinta kale: dhiigooda, xoolahooda iyo sharaftoodu ay xaaraan ka yihiin. Inkastoo erey-cilmiyeedka “ilaalinta sharafta” uu badalayo ereyga “ilaalinta karaamada aadamaha” waliba “ilaalinta xuquuqda aadamaha” marka loo fiirsado qormooyinka cusub ee qaadaa dhigaya cilmiga ujeedooyinka shareecada, si uu u noqdo ujeedo ka mid ah ujeedooyinka shareecada.

Waxaan kaloo arkeynaa dood ka dhaxeysa aqoonyahanada Muslimiinta ah iyo kuwa kale, oo ku saabsan is waafaqa xuquuqal insaanka caalamiga ah iyo ka islaamka, iyadoon ognahay in ogeysiiskii caalamiga ee xuquuqal insaanka islaamka la soo saarey 1981kii, kaasoo ay soo saareen culumo badan oo muslimiin ah, kana soo jeeda dhinacyo badan, waxeyna u kaalmeysteen soo saariddiisa ururka UNESCO (ururka qaramada midoobey ee waxbarashada, cilmiga iyo dhaqanka). Wuxuuna asaas ahaan cuskanayaa ogeysiiskaasi Quraanka iyo axaadiista

Nabiga (scw). Waxaana la ogaadey in qodobada xuquuqdee ku jira ogesiiskaasi islaamiga guud ahaan ay ku wada jiraan ogeysiiska xuquuqal insaanka caalamiga, sida: xaqa noolaanshaha, xuriyadda, sinnaanta, cadaaladda, garsoor cadaaladeed, inaan la jidh dilin, xaqa qaxootinimadka, xuriyadda diinta, qowlka iyo ururka, xaqa waxbarashada iyo socodka. Inkastoo xubno ka tirsan ururka xuquuqda aadamaha ee raacsan qaramada middobey ay walaacooda ka muujiyeen ogeysiiskan islaamiga ah, halka ay xubno kale ay muujiyeen soo dhaweynta ay u hayaan ogeysiiska islaamiga ah, sababtoo ah; wuxuu soo kordhinayaa dhinacyo badan oo wanaagsan, taasoon laga heleyn ogeysiiska caalamigee xuquuqal insaanka, wuxuuna huwinayaa rabbaaninnimo, taaso keeneysa iney dadka dhaqan ahaan u qaataan. Qaab socodka ujeedooyinka shareecada ee casriyeysanna wuxuu taakuleynayaa aragtidan, wuxuuna tixgalinayaa walwalkii xubnihii hore, gaar ahaan marka aan dooneyno rey-cilmiyeedyada ujeedooyinka shareecadu iney noqdaan kuwa casri ah, iyo iney gutaan dowr wanaagsan oo ku wajahan qaab fikirka qaanuunka caalamiga ah. Waxaan shaki ku jirin in xidhiidhka ka dhaxeeya mawduucyada ujeedooyinka shareecada iyo qodobada xuquuda aadamuhu ay u baahanyihiin baadhis qotta dheer si la isugu soo dhaweeyo aragtida labada qeybood eeen kor ku soo sheegney.

Sidoo kale erey-cilmiyeedka “ilaalinta diinta” ay adeegsadeen Al-qasaali iyo shaadibi waxaa horey u tilmaamey Al-caamiri markuu ka hadlayey cuquubada “ka bixidda diinta”. Casriganse aragtidii oo si ka duwan loo dhigey ayey soo bandhigayaan Ibnu caashuur iyo kuwa kaleba. aragtiduna waa “xurriyadda diinta”

ama “xuriyadda aaminidda”. Waxeyna cuskanayaan culumada qabta argtida macnaha guud ee aayadda Quraanka ee "لا إكراه في الدين" oo macnaheedu yahay: (diinta la iskuma qasbo), maa daama ay tahay mabda’ guud oo ka xoog badan aragtida “cuquubada riddada”, taasoo ku faafsan fiqhiga, ahna in la dilo qofka diintiisa baddala, hoos tageysana ujeeddada “diin ilaalinta” haduu qofku uunan danbi kaleba laheyn. Taariikh ahaana waxaa muuqata in qodobka “cuquubada riddada” si xun loo adeegsadey, dana siyaasadeedna lagu fushadey, maantana fahanka ujeedooyinka shareecada oo ballaadhey darteed waxaan adeegsan karaa aragtida “diintu qassab ma aha”, mawduucuna baadhitaan dheeraad ah inuu u baahanyahay shaki kuma jiro.

Ugu danbeyna erey-cilmiyeedka “ilaalinta hantida” sida Al-qasaali sheegey, una dhigma weedha Al-caamiri ee ah: cuquubada hanti qaadista ama xadka xatooyada, iyo hadalkii Al-juweyni ee “dhowrsanaanta xoolaha” dhamaantood isbadal baa ku yimid si ay ula jaan qaadaan erey-cilmiyeedyada casrigeena ee dhinacyada dhaqaalaha iyo bulshadaba. Tusaale ahaan waxaan arkeynaa erey-cilmiyeedyo sida: xaqiijinta iskafaala qaadka bushada, wax wada qeybsiga iyo isu soo dhaweynta dabaqadaha bulshada. Sidoo kale in laga ilaaliyo hantida shakhsiyaadka, ku xadgudubka, dhaca, iyo xaaraantinnimeynta ribada, kuwaaso wada ah fahankii assal ahaaneed ee dhaqaalo.

Horumarinta noocanoo kale ah, waxey fursad u tahay, iney ujeedooyinka shareecadu dhiiri galiyaan, koboca dhaqaalaha bulashada, taasoo ah arin ay aad ugu baahanyihiin waddamada islaamku, sidoo kale wuxuu fursad baddal ah oo kobcin dhaqaale iyo maalgalineed u noqonayaa waddamada aan islaamka aheyn

oo aad ugu baahan wadooyin lagaga baxo dhibaatooyinka dhaqaalee maanta.

“Horumarka aadamuhu” waa aragtida ay ka qabto warbixinta qaramada midoobey, kana duwan macnaha “horumar” oo kaliya ah.

Sida ay dhiagayaana warbixinnadii u danbeeyey ee qaramada midoobey kuna aaddan “tilmaamayaasha horumarka aadamaha” dawladaha islaamka u badani wey ka hooseeyaan heerka horumar ee u dhigan, heerkaasoo ku dhisan xisaabaad laga qaatey ugu dhawaan laba boqol oo tilmaame, sida: ka qeybgalka siyaasadeed, heerka waxbarsho la’aanta, heerka galitaanka dugsiyada iyo jaamicadaha, dhexdhexaadka cumriga, helitaanka biyaha nadiifta ah, heerka shaqo la’aaneed, heerka nolosha iyo qaabka cadaaladda bulshdeed. Hase yeeshee dawladaha qaarkood, sida dawladaha shidaalka hodonka ku ah, sidey warbixinadu sheegayaan, waxaa ka jira farqiyo xaga dakhli qarameedka iyo cadaaladda bulshadeed, gaar ahaan ka qeyb qaadashada dumarka ee nolosha guud iyo dhaqaalaha.

Marka lagu daro Muslimiinta laga tirada badanyahay ee ku noo waddamada horumarey, waxaa kaloo jira waddamo Mulimiintu ku badanyihiin oo lagu tiriyey waddamada horumarsan, waxaana ka mid ah: Burunaay, Qadar, Imaaraadka Carabta. Inskastoo isu geyn tirada Muslimiintee waddamadaa ku nooli ay ka yaryihiin boqolkiiba hal marka loo eego tirada guud ee Muslimiinta caalamka. Waxaa kaloo ka mid ah dawladaha ugu horumar hooseeya: Yemen, Nayjeeriya, Muritaaniya, Jabuuti, Gaambiya, Senigaal, Giniya, Ivory Coast, Maali iyo Nayjar. Isu

geyn Muslimiinta ku nool waddamanna waxey gaadhayaan boqolkiiba toban tirada guud ee muslimiinta.

Waxaanan soo jeedinayaa inaan ka dhigno “tilmaamaha horumarka aadamaha” mid lagu qiyaaso xaqiiqoobidda “masaalixda guud” ee casrigeena, taaso keeneysa iney shareecadu ku dadaasho xaqiijinta masaalixdaas iyadoo adeegsaneysa axkaamta tacaamulka ee kala duwan. Sidan oo loo fahmo ujeedooyinka axkaamta diinta, waxey suurta galineysaa inaan ogaan karo dhaboobiddeeda xaqa ah iyadoo la raacayo waddooyin cilmiyeysan oo sax ah. Waxaan u baahanahay cilmi baadhisyo dheraad ah oo ku saabsan horumarka aadamaha sida aragtida ujeedooyinka shareecada, sida aan ugu baahanahay xuquuqal insaanka. Waxaanse halkan ka leenahay inuu horumaro baaxadda fahanka “ujeedooyinka shareecadu” si ay u saameyso ujeedooyinka horumarka banii aadamka, waxey aasaas adag u tahay horumarka dunida islaamka, halkey daba taagnaan lahaayeen

Dunida horumarsan wax walbana ka sugi lahaayeen.

## Ujeedooyinka Shareecada oo aasaas u noqda Ijtihaadyo – Dadaallo- cusub

Usuululfiqhiga dhexdiisa waxaan ka arkeynaa inuu farqi u dhaxeeyo kala duwanaanshaha adillada (Quraanka iyo xadiiska) iyo is burintooda, is burinta waxaa loo yaqaanaa: natiijada ka soo baxda run iyo been kaliaya ku jirta, ama xaq iyo baadil meel kaliya lagu wada sheego iyadoon si kaloo seddexaad aan la fileyn. Kala duwanaanshaha is maandhaafka adilladuse waa “adilladoo ugu muuqata aqoonyahanka iney isweydaarsantahay” laakiin xaqiiqada arrinku uunan sidaa aheyn; macnaheedu waxey tahay in marka laba daliiloo ugu muuqda caalimka iney iska horjeedan oo ay is burinayaan, xalna loo heli karin, laakin ayna xaqiiqaduna sidaa aheyn. Is weydaarku wuxuu ka iman fahanka caalimka? Waxeyna ugu muuqanta labada daliil ineynan sinaba isu iman kareyn, maa daamuunan xadiiska si fiican u fahmin. Taasina waxey ka iman kartaa aqoon darrida ka heysa waqtiga xadiiska, duruufta iyo meesha uu ku soo aroorey, arrimahaasina saameyn weyn ayey ku leeyihiin fahanka adillda iyo ku camal-falkoodaba. Waxaa baadhitaan kadib cadaan karta in labada xadiis ee u muuqda iney is burinayaan midkood uunan si sax ah u soo aroorin, halkaana ku dhamaato mushkiladdii noo muuqatey ee is burinta aheyd, markuu noo soo hadho hal xadiis oo saxiix ah, waana wax ay culumadu ku magacaabaan “tarjiix” oo ah doorashada aragtida saxda ah. Haseyeeshe waxaa dhici karta, doorashada ra’yiga saxda ah inoo galaan arimo shakhsiyadeed. Waxaana tusaale ahaan loo soo qaatey xadiiskii uu Abii hureyra wariyey ahaana: (laba Nin ayaa Caa’isha u soo gashey, markaasey yidhaahdeen Abuu hureyra wuxuu Nabiga –scw- ka warinayaa inuu yidhi: waxa la

baaseystaa waa dumarka, gaadiidka iyo guriga). Caa’ishase –akn- waxey tidhi: kii Quraankii Nabiga ku soo dajiyey ayaan ku dhaarteye sidaa ma odhan, ee wuxuu yidhi:  dadkii jaahiliyaddu waxey odhan jireen, baaseysigu waa dumarka, daarta iyo gaadiidka.

Labadan xadiis ee saxda ah waxey u muuqdaan iney is burinayaan, culumada xadiiska badankooduna wey qaadan waayeen xadiiska Caa’isha, inkastoo axaadiis kaloo taageersani jirto, sida xadiiska uu warinayo mikhmar Ibnu Mucaawiya oo yidhi waxaan maqley Nabigii (scw) oo leh: baaseysi ma jiro, waxeyna yididiiladu ku jirtaa dumarka, faraska iyo gaadiidka, iyadoo haddana daliishatey macnaha guud ee aayadaa:

مَآ أَصَابَ مِن مُّصِيبَةٖ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَلَا فِيٓ أَنفُسِكُمۡ إِلَّا فِي كِتَٰبٖ مِّن قَبۡلِ أَن نَّبۡرَأَهَآۚ ٢٢

**الحديد: 22**

Waxaan arkeynaa Ibnul Jawsi oo ka tala bixinaya isagoo leh “tani waa diidmo cad oo ku wajahan xadiis wariyayaashiisa lagu kalsoonyahay”, inkastoo xadiiskeeduna yahay mid saxiix ah, waxaa Ibnul Carabi lagu dhaliiley, odhaahdiisii uu ku tilmaamey hadalkeedu inuu yahay mid laga tagaan ah, ma habooneyn isagoo kale in laga soo xigto jawaabtaasoo kale inuu ka bixiyo ra’yigii hooyadii Mu’miniinta (ARN). Ujeeddada aan hadalkan u soo bandhigneyno waxey tahay, inaan tilmaano in qanaacada qofku ay saameyn ku leedahay doorbididda laba ra’yi ama daliilo is maan dhaafsan midkood.  Culumada badankooduna waxey qabaan, in labada daliil (aayad ama xadiis) ee is maan dhaafsan midkod inuu mansuukh (laga guurey) yahay, naskhiguna wuxuu ku sugnaanayaa oo kaliya ah, labada daliil oo la ogyahay inuu midkood horeeyey ka kalena danbeeyey, marka is maan

dhaafkoodu wuxuu ku dhammaanayaa in kii danbeeyey la qaato. Taaso macnaheedu yahay: in labada aayadood ee kala danbeeyey, ta danbe naasikh tahay, tii horena mansuukh tahay, sidaasoo kalena loola dhaqmo axaadiistana. Sidaa darteedbaa waxaa jira axaadiis badan sugnaashahooda wax muran ahi uunnan ku jirin hadana aanan lagu camal faleyn, sababtoo ah; fuqahada qaar waxey awoodi waayeen iney qaab loogu wada camal fali karo u kulmiyaan.

Hadalka Nabigana (scw) lagama helayo aragtida naskhiga, sida ay fuqahadu u sheegayaan. waxaan baadhitaan ku sameeyey kalimadda "نسخ" iyo wixii ka farcama, oon ka raadiyey kutubta xadiiska oo aad u badan, sida: Bukhari, Muslim, Tirmidi, Nasa’i, Abuu daawuud, Ibnu maaja, Axmed, Maalik, Daarami, Almustadrak, Ibnu xibaan, Ibnu khuzeyma, Beyhaqi, Daaru qutni, Ibnu Abii Sheybah iyo Cabdurrazaq, kamana arkin hal xadiis oo sax ah; tilmaamayana kalmaddan. Waxaanse heley ilaa afartan xaaladood oo naskhi ah, oo kutubtan ku soo aroortey, dhamaantoodna waxey u noqonayaa wariyayaasha xadiiska midkood ama kuwii xadiiska sharaxay mid ka mid ah.

Waxaan kaloo arkey sheekada naskhigu iney in badan ku aroortey hadallada Asxaabta ee ku wajahan axaadiista, waxeyna u badanyihiin macnaha gaar yeelidda "التخصيص" oo ku fasirayaan xadiis macnihiisu ka hor imanayo xadiis kale, inuu midi xaalad gaar ah ku koobanyahay, ka kalena xaalad guud, oo aheyn macnihii naskhiga ee ahaa in ku camal falkii la joojiyo.

Sidoo kale waxaan arkeynaa kutubtiii Tafsiirka ee hore, ineynan sugeynin aragtida naskhigu iney tahay xukun hore oo xukun

danbe lagu baddalo, sababtoo ah; aayadihii la sheegey iney nasakhanyihiin waa lagu kala aragti duwanaadey.

Waxaan eegeynaa hal tusaale ah oo caddeynaya in naskhiga la andacoodo daliil la'aan, waana aayada ku soo aroortey suuratu Towba, ee loo yaqaano "aayadda seefta", waxeyna aayadu leedahay sidan:

فَإِذَا ٱنسَلَخَ ٱلۡأَشۡهُرُ ٱلۡحُرُمُ فَٱقۡتُلُواْ ٱلۡمُشۡرِكِينَ حَيۡثُ وَجَدتُّمُوهُمۡ وَخُذُوهُمۡ وَٱحۡصُرُوهُمۡ وَٱقۡعُدُواْ لَهُمۡ كُلَّ مَرۡصَدٖۚ ﴿٥﴾ التوبة: 5

Aayadu waxey soo dagtey sanadkii sagaalaad ee hijriyada, waqtigaana dagaal ayaa muslimiinta iyo mushrikiinta dhexmarey, aayadaha ku hareereysan markaan eegnana waxaan arkeynaa iney dagaalkii uun ka sheekeynayaan, suuraduba waxey ku saabsanyahay dagaal, laakiin tafsiirka aayadan ayaa laga dhex soocey oo la andacoodey iney aayadu dhigeyso xidhiidhka u dhaxeeya muslimiinta iyo gaalada mar walba, xaalad kasta iyo meel walboo la joogaba. Sidaa darteedbey yidhaadeen kuwii naskhiga andacoodey: aayadani waxey nasakhdey, in ka badan laba boqol oo aayadood oo dhamaantood ku baaqaya: wada hadal, nabad, wada noolaansho, dulqaad iyo xuriyadda diinta, xataa aayadihii sabirka ku baaqayey! Waddada kaliyeey doorteena, si ay u suuliyaan is maan dhaafka, waxey noqotey iney andacoodaan aayadan soo dagtey dabayaaqooyinkii noloshii nabiga (scw) iney nasakheyso aayad walboo ka horeysey kana horjeeda macnaheeda. Sababtan darteed baa waxaa la andacoodey iney nasakhanyihiin aayadahan:

لَآ إِكۡرَاهَ فِي ٱلدِّينِ لَآ إِكۡرَاهَ فِي ٱلدِّينِ ﴿٢٥٦﴾ البقرة: 256

فَٱعۡفُ عَنۡهُمۡ وَٱصۡفَحۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلۡمُحۡسِنِينَ ﴿١٣﴾ المائدة :13

ٱدۡفَعۡ بِٱلَّتِي هِيَ أَحۡسَنُ ٱلسَّيِّئَةَۚ ﴿٩٦﴾ المؤمنون :96

فَٱصۡبِرۡ إِنَّ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٞۖ ﴿٦٠﴾ الروم : 60

۞ وَلَا تُجَٰدِلُوٓاْ أَهۡلَ ٱلۡكِتَٰبِ إِلَّا بِٱلَّتِي هِيَ أَحۡسَنُ ﴿٤٦﴾ العنكبوت : 46

لَكُمۡ دِينُكُمۡ وَلِيَ دِينِ ﴿٦﴾ الكافرون:6

Iyo kuwo badan oo kale. Sidoo kale waxey nasakheen daliil la’aan in badanoo axaadiista ka mid ah, kuwaasoo sheegaya in heshiisyo nabadgaliyo iyo wada noolaansha ah lala gali karo kooxaha iyo diimaha kala duwan. Waxaana ka mid ah saxiifadii ama heshiiskii Madiina, oo uu Nabigu (scw) la galay Yahuudii Madiina daganeyd, waxaana ku xusan, iney Muslimiinta iyo Yahuudu umad kaliya yihiin, Muslimiintuna diintooda leeyihiin, Yahuuduna sidoo kale. Laakiin shurraax (tafatirayaal) badan ayaa sheergey iney saxiifada ay nasakhdey aayadii seefta een kor ku soo sheegney. Qofkuna markuu u fiirsado aayadaha iyo axaadiista qaarkoodna dagaalka sheegaya, qaarka kalena heshiis iyo nabadgaliyo sheegayaan, wuxuu qofku is odhan karaa wey is maan dhaafsanyihiin.

Laakiinse waxaan fahmi waayey waxa qofka ku qasbaya inuu kala doorto dagaal ama nabad joogta ah, mar walba iyo meel walbaboo la joogaba. Waxaana arrinkan naskhiga sii muran galinaya, tirada xaaladaha naskhiga eey Taabiciyiinta iyo atbaacdoodu sheegeen wey ka bdan tahay tirada ay asxaabtu sheegeen. Qarniyadii hore markey tageenna waxaa la arkey Culumada ka tirsan madaahib kala duwani iney ku soo dareen

xaalada kaloo naskhi ah oo aynan taabiciyiintu sheegin, si wax uu naskhigu yahay aalad la iskaga celiyo qofkii kaa ra'yi duwan. Tusaale ahaan Abulxasan al-karkhii oo kale (dhi: 951m) wuxuu qorey: "aayad walboo khilaafsan ra'yiga mad-habteenna wey macna rogantahay ama wey nasakhantahay. Hadaba la yaab ma leh inaad aragto, xukun wax nasakhaya mad-hab marka loo eego, iskiisuna nasakhanyahay markii mad-hab kale loo eego, maxaa yeeley; naskhigiibaa culumada badhkood ku ag noqdey wax aan xad laheyn oo qofba si u sheego.

Hadba waxaa halkan imanaya dowrkii ujeedooyinka shareecada, maxaa yeeley; waa qaab cilmiyeysan oo ay ku kala saarto nusuusta daahirkoodu is maan dhaafsanyahay, taana waxaan ka arki doonaa bandhiga tusaalooyinkan soo socda:

1- Waxaa daliilo is maan dhaafsan oo tilmaamaya qaabab kala duwan oo loo guto cibaadooyin, haddana dhamaantood si ayaa loo soo wariyey. Waxaa wax laga xumaada ah in kala duwanaanshaha adilladaasi ay sabab u noqdaan muran iyo is qabqabsi badan oo ka dhaca goobaha cibaadada! Hadii loo fiirsadose nusuustaas, iyadoo laga duulayo aragtida ujeedada shareecada, waxaa la ogaanayaa ujeedada "fududeynta" oo uu Rasuulku(scw) ku tusuyey qaabab kala duwan oo loo guto cibaadadii kaliya ahayd, taasoo tusineysa dabacsanaanta wanaagsanee ku jirta gudashada cibaadadaas. Tusaalooyinka cibaadooyinkaas waxaa ka mid ah, qaababka kala duwan ee gacanta loo dhigo salaaddda dhexdeeda, dhaqdhaqaaqyada kala duwan ee salaada, qaababka attaxiyaadka, qaababka sujuudu-sahwiga, qaababka takbiirta ee salaada ciidaha iyo siyaabaha kala yar duwan ee xajka loo gudanayo …iwm.

2- Waxaa jira dhawr riwaayadood oo uu leeyahay xadiis ku saabsan “caadada” ama “dhaqanka”, waxaase laga fahmi karaa, marka laga eego dhinacan ujeedooyinka shareecada, ujeeddada “caalaminimada shareecada”. Si kale marka loo dhigo waxaa kaloo laga fahmayaa kala duwanaanshaha riwaayadaha xadiiskaas; kala duwanaanshaha dhaqamada bulshooyinka adduunka, taasoo ka dhigan iney shareecada Islaamku mid caalami ah tahay, bulsho walbana dhaqankeeda ay tixgalineyso, ee aynan ahayn is xadiiskii oo is burinaya xa. Waxaana ka mid arintaas laba xadiis oo labaduba si sax ah ugu nisbeysanyihiin Nabiga (scw) oo ay Caa’ isha (akn) warineyso, midi wuxuu sheegayaa in haweeneydii guursata wali la’aan in nikaaxeedu baadil yahay, waxaa soo saarey (Abuu daawuud, Tirmidi, Ibnu maajah, Ibnu xibaan, Xaakim iyo Ibnu cadiyi, dhamaantoodna waxay ka wariyeen Caa’isha). Halka xadiiska kale u fasaxayo haweeneyda garoobka ah (horey u guursatey) iney dooraneyso ninka ay guuesaneyso, (waxaa soo saarey Maalik, Muslim oo maalik u marey, Abuu daawuud, Tirmidi, Ibnu maajah iyo Daarami, kulligoodna Caa’ishey ka wariyeen). Sidoo kale waxaa la wariyey iney Caa’isha (RC) oo labadan xadiis warisey nafteedu ay fulisey guur aan shardigaa waliga la buuxin, waxaa la wariyey inuu dhistey Xafsah bint Cabdurraxmaan Ibn Abiibakar oo aheyd gabadh walaalkeed dhaley, isagoo maqan, taana waxaa laga fahmayaa iney qabto in nikaaxu wali la’aan ansaxayo, sida culumada qaar ay yidhaahdeen. Culumada xanafiyada qaarkoodna waxey ku fasireen diidmada la diidey nikaaxa wali la’aanta ah, inaan haweeneyda loo nisbeynin

shuqul xumo, marka loo eego dhaqamada qaarkood. Hadiise loo fahmo labada xadiis in tilmaamayaan kala duwanaansha dhaqan ee dadka, lagana eego dhinaca "caalaminimada shareecada" waxaa halkaa lagaga gudbayaa, mushkiladda ismaan-dhaafka labada xadiis, waxeyna fududeyneysaa fulinta guurka xaalad kasta iyo meel kastoo la joogaba. Waxey kaloo sahleysaa in muslimiinta la jaan-qaadaan dhaqamada dadka ay la noolyihiin, fushadaana guurkooda sida ay u qabsato, wixii aan xaaraan ahayn. Fahankaasina wuxuu balaadhinayaa, dhaqanka wada noolaanshaha iyo is-fahanka bulshooyinka isir iyo dhaqamo kala duwan ka kala socda.

3- Axaadis tiro ah ayaa waxaa lagu darey qeybta "mansuukha" ah, in kastoo ay yihiin, maraaxil kala horeysa oo wax lagu fulinayo, ujeedada laga leeyahayna marxaladeynta shaqadana waxaa weeyaan, in la sahlo ku dhaqmidda awaamirta shareecada iyo fogeynta caadooyinka xun xun. Axaadiista la moodo iney iska hor jeedaan, waxaan la rabaa in loo faho, marxaladeyntii ku dhaqanka axkaamta shareecada, gaar ahaan wixii ku saabsan dadka diinta ku cusub oo ay ku adagtahay la qabsiga qaadashada axkaamta.

4- Culumada qaarkood ayaa ku tiriyey dhowr xadiis iney iska hor jeedaan, maxaa yeeley; kalimadahooda ayaa laga fahmayaa axkaam kala duwan oo ku saabsan xaalado isku eg, laakiin markaan u fiirsano waxaan ogaaneynaa iney axaadiistaasi ku saabsanyihiin dadyow kala duwan. Taana waxaa lagu gaadhayaa ujeeddada ah "in dadka loo xasiliyo maslaxadda ugu sarreysa" waana waddada lagu fahmi karo ***nusuusta*** noocaasoo

kale ah. Tusaale ahaan waxaan heynaa axaadiis dhowr ah, oo sheegaya inuu nabigu (scw) u sheegey haweeney hadey guursato iney waayeyso ama ay ka wareegeyso xanaaneynta ilmaha, (Abuu daawuud oo C/llahi Ibn Camri ka wariyey). Halka aan ka arkeyno axaadiis kaloo ka hor jeedda, sida qisadii umu salama, oo ilmaheedii heysatey, markuu Nabigu (scw) guursadey kadib, iyo qisadii gabdhii Xamsa oo nabigu u xukumey habaryarteed oo reer lahayd. Hadaba culumada badankoodu waxey cuskadeen, axaadiistii hore, si ay u yidhaahdaan: “xanaaneyta ilmuhu si toos ah ayay ugu wareegeysaa aabaha hadey hooyadu guursato”, waxeyna sabab uga dhigeen iney axaadiista hore ka xoog badantahay kuwa danbe, maa daama uu bukhaari wariyey. Ibnu Xazmise, wuxuu cuskadey qeybta labaad oo wuu diidey qebtii hore, maadaama uu shakiyey xifdiga mid wariyayaasha ka mid ah. Laakiin Sancaani ayaa ku celiyey xukunka “maslaxadda ilmaha” kadib markuu labada kooxood e axaadiista ah soo taxey, wuxuuna yidhi: “haddey hooyadu u roontahay, iyadaa la siin, hadii kalana aabaha” wuxuu kaluu yidhi: “sharrecaduna intaa kama baxsanaaneyso”. Hadalkaana waxaan ka arkeynaa cadaalad iyo maslaxad, lagamana yaabo iney shareecadu ku sifeysnaato waxaan cadaalad iyo maslaxad aheyn, aragtida noocan ah waxey qofka ka dhigeysaa inuu qaato mowqif cadaaladeed iyo masalaxadda bulshada, xataa hadeynan qaanuunka lagu dhaqmaayi uunan islaami aheyn, cadaaladdu waa wax qawaaniintoo dhan ka wada dhaxeeya.

## Kala Saaridda Wadiiqooyika iyo Yoolasha

Sh. Maxaed Al-qasaali ayaa kala saarey wadiiqooyinka iyo yoolasha, wuxuuna ku sheegey wadiiqooyinku iney yihiin wax dhamaada, is badbdalana, halka ay yoolashu yihiin waxaan dhammaanin, isna baddalin. Wuxuuna tusaale u soo qaatey, nidaamka qaniimooyinka oo ku xidhan xukunka, wuxuuna sheegey, inkastoo qaniimada Quraanka lagu sheegey, hadana waxey ka mid tahay wadiiqooyinka is badala.

Sh. Yuusuf al-qardaawi iyo Sh. Yuusuf Mowlawi ayaa iyaguna ku ballaadhey ahmiyadda kala saaridda "wadiiqooyinka iyo yoolasha" markii doodo ballaadhani ka socdeen Golaha fatwada iyo cilmi baadhista ee Yurub, oo lagaga wada hadlayey dhalashada bisha Ramadaan markii yurub la joogo. Labada sheekhba waxey qaateen, fikraddi lafteedii oo ah, in aragtida bishu ay tahay "wadiiqo" lagu sugayo galidda bisha Ramadaan, ooynan aheyn ujeedo sideeda loo gaadhayo. Waxeyna yidhaahdeen xisaabaadka falakigu waa wadiiqada ugu wanaagsanee maanta lagu ogaan karo soo galidda bisha Ramadaan iyo dhammaadkeeda. Wuxuu kaluu Sh. Al-qardaawi ku sheegey jilbaabka haweyneyda muslimadda ah inuu yahay wadiiqo lagu ilaalinayo "dhowrsanaanta" ee uusan laftiisu ujeedadii kama danbeysta aheyn. Waxaa si cad iigu muuqatta kala saaridda "wadiiqooyinka iyo yoolasha" waxaa ku furmaya fagaara ballaadhan oo aragtiyo islaami ah oo cusub iyo kuwo soo jireenba ah. Tusaale ahaan Dr. Taha al-calwaani ayaa wuxuu soo bandhigey, mashruuca wanaajinta argtida markuu diyaarinayey kitaabkiisii ***islaaxul fikril islaami***, wuxuuna ku soo bandhigey aragtida kala saaridda wadiiqada iyo yoolka oo la xidhiidha arin

aad muhiim u ah, taasoo ah qadiyadda sinnaanta sharci ee labada jinsi (rag iyo dumar), wuxuuna yidhi:

Quraanku markuu soo dagayey wuxuu dadka gaadhsiiyey qanaaco buuxda oo ku wajahan sinaanta labada jinsi, qodobkana waa qodob diinta ka mid ah oo muhiim ah, oon ka qiima yareyn qodobada kale, sida ololihii lagu qaadey cibaadada ***asnaamta...*** waxaana qasab ku aheyda bulshadii Muslimka aheyd, ee ka ag dhaweyd caadooyinkii jaahiliga, iney marxalado ku dhaqan galiso is badalladaas, ulana qabsato hadba kartideedu sidey tahay. Hadaba markuu islaamku go'aamiyey, iney dumarku markhaatiga ka galaan heshiisyada -taasoon horey u jiri jirin- wuxuu damacsanaa inuu dhidibada u aaso, dowrka ay dumarku nolosha ku leeyihiin, ujeedaduna waxey aheyd, in la so af jaro argtidii xumeyd ee dumarka laga qabey, laguna darey markhaatiyaasha la rabo ee la qaadan karo, markii uu Quraanku yidhi: "ممن ترضون من الشهداء" run ahaantii, dumarka oo laga qeyb galiyo markhaatiga, waxey ahayd, "wadiiqo" loo marayey "yool", waxeyna ahayd dhaqangalinta fahanka "sinaanta labada jinsi". Mowqifka mufasiriintu ay ka qabaanse "أن تضل احداهما فتذكر احداهما الأخرى"(isla aayadii hore) waxey ka qaateen, inuu markhaatigu labo naagood u qeybsamayso, tanina waxey muujineysaa ineynan raga la sinneyn, mufasiriintii hore iyo kuwii danbeba taasey isku raaceen, jiilashii iska daba yimidna fahankaasey ka daba galeen, <u>inkastuu fahan khaldan yahay!</u> Waxaaban shaki ku jirin oo kale, in fahankaasi fagaaraha fiqhiga in badan uu dhaafey.

Waxaa kaloo jira ra'yi uu soo jeediyey Aayatullah Mahdii Shamsuddiin, oo ku yidhi Fuqahadu maanta waa iney yeshaan

aragti “wareegta” oo ku wajahan fahanka Quraanka iyo sunnaha, loona arkin aayad walboo Quraanka ka mid ahi iney tahay, sharci dajintii guud ee u danbeysey, maa daama ay dhici karto iney ku soo dagtey durruf gaar ah, loona maleynin munaasabadaha ay ku soo arooreen, axaadiista rasuulku(scw) iney yihiin kuwo joogta mar walba iyo meel walbaba, saameynayana cid kasta. Wuxuuna raaciyey in kastoo uu xaga fahankan u janjeedho, hadana xukun axkaamta shareecada ka mid ah inuunan ku gu’aamineynin wakhtigan xaadirka ah, hase yeeshee wuxuu doorbidayaa, in mabda’an lagu saleeyo axkaamta la xidhiidha, dumarka, dhaqaalaha iyo jihaadka.

Tusaale kale ayaa wuxuu yahay, aragtiddii Dr. Fatxi Cusmaan oo dib u eegey “dhinacyada camaliga” ah ee looga dhigey markhaatiga dumarku inuu ka hooseeyo ka raga, sida ay sheegeyso aayadda aan soo dhaafney. Hadaba Dr. Fatxi Cusmaan ayaa isku dayey inuu dib u akhriyo qaab-fulinta macnaha aayadda, sida uu sameeyey Sh. Taha Jaabir al-calawaani een kor ku soo xusney. Sidaa si la mid ah, ayuu soo bandhigey Dr. Xassan al-turaabi wixii khuseeya axkaamta dumarka iyo dharkooda.

Roojeeh Jaaruudina wuxuu ka dhawaajiyey isla fikirkaas, wuxuuna yidhi: waxaa haboon in loo qeybiyo quraanka laba qeybood; qeyb taariikhi ah, tusaalaheeduna yahay, axkaamta dumarka la xidhiidha, qeybta kalena waa “qiimayaasha waara ee kitaabka intiisa kale ku soo aroortey”. Cabdukariim Sharsuus ayaa isna qaba in quraaku noqdo laba qeybood; qeyb sugan iyo qeyb hadba sida deegaanka,

Dhaqanka, bulshada iyo taariikhdu isu badalayaan is baddali kara.

Waxaase muhiima, inaan u fiirsanno in qoraayaasha ku saamoobey falsafadda casrigee Reer Galbeedka, ay ku talax-tageen, taariikh iyo druuf ku xidhida axkaamta, waana waxa qorayaasha qaarkood ay ku tilmaamaan "taariikhnimo", bal waxey isku dayaan, dhaqan galintaa fikirkaas oo meeshaba ka saareysa ku dhaqanka axkaamta kitaabka. Mowqifkan taariikhnimada ah ee u arka axkaamta quraanka iyo sunnuhu ey ku koobanyihii duruuftoodii, taariikheed iyo dhaqan ee ay ku soo dageen, si wax uu kitaabku yahay natiijadii dhaqanka iyo duruufaha samankaas, sida ay ku andacoonayaan qaarkood.

Aragtidan oo kalena waxey ka dhigantahay inuu Quraanku yahay "qoraal taariikhi ah" oon faa'ido lahayn illaa waxaan ahayn in laga fahmo, nolol bulshadeedkii jirey wakhtigii diintu soo dageysey. Sidaana waxaa ku andacoodey Naagta la yidhaahdo: Haydaa Moogissi, markii ay ku hadaaqdey iney "shareecada la jaan qaadi karin mabda'a sinnaanta aadamaha", waxey ka sii dartey markii ay tidhi: "in kastoo la weeciyo macnayaasha ***nussusta,*** marnaba awaamirta quraanku lama socon karaan qawaaniinta khuseysa xuquuqda dumarka, waajibaadkooda iyo sinnaanta labada jinsi". Ibnu warraaqna wuxuu sideedii si la mid ah ku andacoodey, iney xuquuqda insaakee islaamka ku sugan, soo bandhigeynin "wax la barbar dhigi karo mabda'a xurriyadda". Waxaa ku raacey isna Ibraahiim Muusaa oo yidhi: "waxaa suura gal ah inuu fiqhiga islaamigu u noqdo tusmo "aragtida akhlaaqeedka" ee casrigan".

Aniguse waxaan qabaa aragtida odhaneysa “quraanku caadil ma aha” amaba “akhlaaq ma leh” waxey burineysaa rumeynta kitaabka laftiisa. Dhinaca kalena waxaan aaminsahay, dhacdooyinka taariikheed iyo axkaamta fiqhiga qaarkeed in loo fahmo, xaaladihii iyo duruuftii dhaqan, taariikh iyo juqraafi ee farriinta islaamka.

Waxaan mar kale leenahay, furaha lagu fahmi karo nusuusta inuu yahay, kala saaridda wadiiqooyinka is badbaddala iyo yoolasha iyo mabaadii’da sugan. Maxaa yeeley; wadiiqooyinku wey is baddali karaan, waa laga tagi karaa- sida uu Imaamul qasaali tilmaamey, mabaadii’da iyo yoolashuse isma badalaan.

## Ujeedooyinka Shareecada iyo Tafsiirka Mowduuciga ah ee Quraan kariimka

Dadaallada laga geystey tafsiirka mowduuciga ah, waxey gaadheen natiijooyin fiican oo lagu tilmaami karo iney yihiin kuwa ku saleysan ujeedooyin. Akhrinta mowduuceed ee Quraankuna waxey ku saleysantahay, argtida ah inuu Quraanku yahay “cutub dhammeystiran”. Aragtidaa iyadoo laga duulayo ayaa loo arkayaa aayadaha axkaamta ee Quraanka ku soo aroorey iney guda ballaadhanyihiin, quraankoo dhanna saameynayaan. Sidaa awgeed aayadaha ka hadlaya, caqiidada, qisooyinka nabiyada, aakhirada iyo kownkaba, dhamaantood waxaa loo qaadanayaa iney yihiin qeybo ka tirsan cutub dhameystiran, waxeyna ka wada qeyb qaadanayaan, diyaarinta axkaamta fiqhiga ah. Qaabkanoo kale wuxuu fursad siinayaa mabaadii’da iyo qiimayaasha akhlaaqeed oo ah dhinacyada ugu badan ee ay xooga saareen qisooyinka nabiyada iyo mowduucyada aakhiroba, waxeyna aas aas u noqoneysaa

axkaamta fiqhiga ah, kabeysaana dariiqadii sooyaalka aheyd ee axkaamta fiqhiga ah lagu soo saaran jirey.
Isla qaabkaa Quraanka loo farssirayo ayaa ah in loola dhaqmo axaadiistana, waxaana laga diraaseyn axaadiista dhinaca mowduucyadooda, iyadoo si guud loo eegayo naska xadiiska, laguna darayo fahanka nolosha Nabiga (scw) iyo ujeedooyinkeeda. Dariiqaddan oo kale waxey keensaneysaa inuu baadhuhu is weydiiyo saxnimada xadiiska iyo la'aantiisa hadii uu waafaqi waayo qiimayaasha iyo mabaadii'da cad cad ee diinta islaamka. Sidoo kale hadii ay fuqahadu is waafajin kari waayaan labada xadiis, saxiixnimada labada xadiis midkood, waxaa lagu miisaamayaa, hadba sida uu mabaadii'da Quraanka u waafaqsanyahay. Taana waxaa yidhi dhowr ka mid ah Culumada casrigeenana. Taasina waxey ka dhigantahay, saxiixnimada "matniga" ama "nuxurka" xadiiska, waxey ku xidhantahay, waafaqidiisa uu waafaqayo mabaadii'da guud ee islaamka.

Ugu danbeyna waxaan leenahay, manhajka ku saleysan ujeedooyinka wuxuu dabooli karaa, duleelo waaweyn oo la xidhiidha gudbinta axaadiista suuban si guud ahaneed, waana duleelka la xidhiidha munaasabadda iyo xaaladda uu xadiisku ku soo aroorey. Inta badan axaadiista suuban ee ku soo aroortey kutubta kala duwan, waxey ka koobantahay, weedh, ama laba weedhood, amaba waxey jawaab u tahay, su'aal ama laba su'aalood, inta badana, xadiiska lama socoto, duruuftii taariikheed, deegaan, siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho ee uu ku soo aroorey. Waxaa la helaa axaadiista qaar, oo uu saxaabigu yidhaahdo: "ma ogi, Rsuulku (scw) waxa uu sidaa u yidhi, ma sababtanaa? Mise

waa taa!" Wax yar beyna dhacdaa, iney la soo aroorto xadiiska, sababtii loo yidhi, sidey saxaabadu u qaabishey iyo sidey u dhaqan galisey, arimahaasoo dhana waxaa looga tagey, u fiirsiga wariyaha xadiiska iyo fiqhi yaqaanka. Aragtida "dhammeystirka leh" waxey naga caawineysaa, kabidda nuqsaantaa inagaga imaneysa, fahanka iyo aqoonta aan u lenahay, waxa guud ahaaneed iyo kii gaar ahaaneedba, anagoo cuskaneyna aqoonta aan u leenahay u jeedooyinka shareecada.

## Fahanka Ujeedooyinka Nabawiga ah

Intii hore ee axaadiista ku saabsaneyd waxaa inoo dheer, in ujeeddooyinka Rasuulka (scw) naftooda looga faa'ideysto, isku duwidda axaadiista gooni uga taagan taxanaheeda. Waxaan horey u soo caddeyney siduu al-Qaraafi u kala saarey, falalka Rasuuka (scw) ee garsoorka, fatwada iyo imaanimadka iyo sida uu u caddeeyey in dowrarkaa kala duwan ee uu gudanayo Nabigu, saameyntooda iyo raadadkoodu shareecada ku kala duwanyihiin.

Ibnu caashuurna wuxuu ku darey, dhinacyo kaloo ka tirsan "ujeeddoyinka rasuulka" taasoo ka guda ballaadhan aragtiddii uu soo bandhigey al-qaraafi. Waana tan qaar ka mid ah, "xaaladaha" iyo ujeedooyinka Nabigu, sida uu Ibnu caashuur u taxey:

1- Sharci dajin: tusaalayaasha loo soo qaadan karo sharci dajinta Rasuulka (scw) waxaa ka mid ah, markii xajka lagu jirey inuu yidhi: "خذوا عني مناسككم" "iga qaata gudasha shaqooyinka Xajkiinna" shaqooyinkaasoo kale sidooda ayaa loo qaadanayaa.

2- Fatwa bixin: waxaa iyana tusaale u noqon kara, fatwooyinkii uu nabigu bixinayey markii xajka lagu jirey. Ninbaa

u yimid oo wediiyey “waxaan gowracay anuunan tuuran” markaasuu ugu jawaabey: “tuuro dhibaato ma lahee”. Ku kalaa u yimid oo yidhi: “waxaan xiirtey anoon gowricin” wuxuu ugu jawaabey: “gowrac dhib ma jiree”. Wariyihii wuu sii wadoo wuxuu yidhi: “maalintaa nabiga lama weydiineynin wax la horreysiiyey ama la danbeysiiyey, illaa wuxuu lahaa: same dhibaato ma lahee”. Xadiiskan oo kalena sidiisaa loo raacayaa, waxaa kaloo laga faa’ideysanayaa xadiiska, wax ku camalka xadiiska dhaafsan oo ah: iney fatwadu qawaacid iyo axkaam leedahay, taasna ay ka mid tahay, tartiibta shaqooyinka xajku ineynan qasab aheyn wixii nas ku soo aroorey mooye.

3- Xukun ridid (garsoorid): Ibnu Caashuur wuxuu soo arooriyey tusaalayaal ay ka mid yihiin: (1) xukunkii uu Rsuulku-scw- uu ku kala xukumey Nin Xadramuut ka socday iyo Ree Kinda ah, oo isku heystey dhul. (2) Xukunkii uu Nabigu –scw- uu ku kala saarey Nin acraabi ah, iyo Nin kaloo ay is heysteen, markii uu acraabigu yidhi: “Rasuul allow na kala xukun” markaasuu nabiguna yidhi “wallee waan idin kala xukumi”. (3) xukunkii uu nabigu ku kala saarey, Xabiiba iyo Saabit, Xabiiba bint Sahl ayaa u dacwootey Nabiga(scw) oo shhegtey ineynan rabin ninkeedii Saabit, dooneysana iney kala tagaan. Nabigaa (scw) ayaa ku yidhi: ma u celineysaa beerstiisii? Markaasey tidhi: wuxuu isiiyey oo dhan waan hayaa. Nabiga (scw) xukumey inuu beerta qaato furana. Axaadiistanoo kale ma aha sharci dajin guud, sida uu al-qaraafi caddeeyey, ee waa xukun ku xidhan qaadiga iyo wuxuu qadiyadda u garto.

4- Hogaanimo (dowrka Nabiga ee maamuliidda muslimiinta): tusaalena waxaa u ah, amarkii uu nabigu (scw) uu ku bixiyey dhul ninkii nooleeya inuu isagu lahaanayo, diidmadii uu diidey inaan la cunin hilibka dameeraha maalintii kheybar, iyo odhaahdii uu Nabigu ka yidhi maalintii Xuneyn "qofkii Nin cadow ah dila, markhaatina u heysta isaga wuxuu wato iska leh". Qaacidada guudna waxey tahay, axaadiista ka hadleysa umuuraha siyaasadeed iyo bulsho waa in loo fahmaa ujeedooyinkeeda guud ee wax tarka u leh masaalixda guud.

5- Waanin (tani sharci dajinta wey ka balaadhantahay): waxaan xadiis uu Bukhaari warinayo …, leeyahayna waxaan la kulmey Abii dar iyo adoon kiisa ah, adoonkuna gashanyahay isku joog, Abii dar baan ku idhi: waa maxey tani? Markaasuu i yidhi: kaaley aan kuu warramee: adoon aan lahaa yaan hooyadii ku caayey, Nabiguuna (scw) ii sheegtey, markaasuu Nabigu i yidhi: "ma hooyadii baad ku ceebeysey, hadaba waxaad tahay qof jaahilnimo ay ku jirto. Addoomadiinu waa adeegayaashiina". Hadaba xadiiskan waxaa ka arkeynaa, waano uu Nabigu si gaar ah uga waaniyey saxaabi sida adoonkiisa uu ula dhaqmey.

6- Heshiisiin: waxaana tusaale u ah xadiiskii uu Nabigu kaga dalbey bariira iney ninkeedii ku noqoto markuu furey kadib, markaasey bariira tidhi: "maad i amreysaa Nabi Allow?" wuxuu yidhi: "maya, laakiinse ergaan ahay". Waxey tidhi: "uma baahni". Wuxuu kaluu Bukhaari warinayaa xadiis ina siinaya tusaale kale, markuu Jaabir aabihii dhintey ayuu Jaabir weydiistey Nabiga

(scw) inuu kala hadlo kuwii deynta ku lahaa iney wax ka dhaadhacaan, Nabigaa la Hadley, weyna diideen. Nabiguna (scw) wuu yeeley. Xadiis kaloo waxaa jira sheegaya inuu Kacb ibnu Maalik weydiistey deyn uu ku lahaa Cabdullaahi ibnu Xadrad, markaasuu Nabigu ka dalbey Kacb inuu daayo deynta kala badhkeeda, Kacb wuu yeeley. Axaadiistanoo dhan asxaabtu waxey u fahmeen ineynan wax qasbid ah ku jirin, oo arrinku yahay heshiisiin iyo isku soo dhaweyn uun.

7- La talinta qofkii tala weydiista: waxaana tusaale u ah xadiiskii Cumar ibnu khadaab uu Nin faras alla dartii u siiyey, kadibna damcay inuu ka iibsado, markaasu Nabiga (acw) la tashadey, wuxuuna ku yidhi "ha ka iibsanin haduu dirham kugu siiyana, sababtoo ah; qofkii ku noqda saqadiisa wuxuu la mid yahay ey ku noqdey mantagiisa". Cidina uma arkin taa inuu nabigu diidmo guud diidey. Tusaale kale waxaa ah, xadiiskii uu wariyey Zeyd, ahaana inuu nabigu (scw) yidhi: "ha kala iibsannina midhaha intuunan bisseylkiisu muuqan", laakiin Zeydbaa hadalkiisaa ka daba yidhi: "si wax uu tala ku bixiyey, maadaama dooddoodu badantahay". Labadan dhacdo asxaabtu waxey ka fahmeen –sidii kuwii horeba- inuunan Nabigu (scw) uunan wax khasab ah saarin.

8- Nasiixeyn: tusaalena waxaa u ah, xadiiskii Nucmaan ibnu bashiir, ee uu yidhi aabahaybaa Nabiga u sheegey inuu wiilashiisa mid ka mid ah hadiyad siiyey. Nabiga (scw) ayaa weydiiyey: "wiilashaadoo dhan ma siisey"? Wuxuu yidhi: "maya!" markaasuu Nabigu (scw) yidhi: "dulmi ha ii markhaati galin".

Halkana; Maalik, Abuu xaniifa iyo Shaaficiba maynan u fahmin inuu Nabigu (scw) u jeedey xaantinimeynta hadiyaddan iyo burinteeda, taana waxaa gargaaraya, riwaayad kaloo leh: “maya, cid kale markhaati gali”.

9- Sida ugu fiican inuu ku booriyo: taana waxaa laga arkaa amarrada nabigu (scw) uu asxaabta u jeediyo, si ay u gaadhaan xaalad dhameystira, taasoo uunan umadda dhammaanteed uunan ku amreynin. Bukhaari wuxuu ka wariyey Al-baraa’a ibnu Caazib inuu yidhi: “Nabigu (scw) wuxuu na amrey todobo, wuxuuna noo diidey todobo: wuxuu na amrey booqashada bukaanka, raacidda janaasada, u duceynta qofka hindhisooda, qofka dhaarta oo dhaartiisa la oofiyo, dulmanaha oo la gargaaro, salaanta oo la fidiyo, yeedhista oo la ajiibo, wuxuuna noo diidey, fargashiga dahabka, weelasha qalinka, dharka xariirta laga sameeyo oo kooraha la saaro, qasiyadda (nooc kaloo xariirta ka mid ah), istabraqa, diibaaj iyo xariir”. Waxyaalahan qaarkood waajibnimadoodu wey sugantahay, qaarna saxaabada ayaa lagu boorinayey iney ka fogaadaan, iyadoon laga xaaraantinnimeynin.

10- Baridda xaqiiqooyinka sarreeya: waxaa tusaale u ah, xadiiskii uu Nabigu (scw) abuu darri ku yidhi: “ma aragtaa buurta uxud? Wuxuu ugu jawaabey: “haa”, Nabigaa (scw) yudhi: “ma jecli inaan lahaado Uxud oo kaloo dahab ah, illaa aan dhammaanteed ku bixiyo waddada ilaahey, seddex diinaar waxaan ka aheyn”. Nabigu (scw) uma jeedin muslimiintoo dhan iney sidaa ahaadaan.

11- Edbin: waxaa dhici karta in laga arako ereyo xeeldheer oo handadaadi ku jirto sida uu Ibnu Caashuur yidhi. Waxaana tusaale u ah, xadiiskii Rasuulka (scw) uu ku yidhi: “wallee ma rumeynin, oo wallee ma rumeynin”. Waxey yidhaahdeen: “waa ayona Rasuul Allow?” wuxuu yidhi: “waa qofka dariskiisu ka nabad galin dhibaatooyinkiisa”. Ujeedaduna waa diidmada iimaanka buuxaa, ee ma aha asalka iimaanka.

12- U qasdin la’aanta waxbaridda: tanna waa waxyaabaha aan ku
saabsaneyn sharci dajin, diin ka yeelasho, edbin iyo nidaamka umadda midnaba.

Waxaana ka mid ah, caadooyinka Rasuulka (scw), ee cuntada, hurdada, labiska, socodka iyo gaadiid-raaciddiisa, tusaalayaasheedana waxaa ka mid ah: joogsigii uu nabigu (scw) dul joogsadey taagii **Muxassib** isagoo eegaya biyihii reer banii kinaanah**,** markuu xajka ka hooyanayey, Caa’ishaana way ka warbixisoo waxey tidhi: “muxassib oo la dagaana howlaha xajka ka mid ma aha” ee waa meel u dagay si uu u baryo, una fududeyd inuu xagga Madiina uga sii baxo.

Fahankan ballaadhan ee uu Ibnu Caashuur ka qaatey axaadiistaa aan soo sheegney, wuxuu kor u qaadayaa heerka fahankeena ujeedooyinka ***nusuuta*** uu gaadhsiisanyahay, wuxuu kaluu furayaa fagaarayaal balaadhan oo la jaan qaadi kara fahanka ***nusuusta*** iyo dhaqangalinteedaba.

## Marmarsiiyo Furid iyo OOdid

“Marmarsiiyo oodidu” waxey ka dhigantahay markii loo noqdo fiqhiga islaamiga ah, diidid ama mamnuucid, waana arrin jideysan xaga shareecada; maxaa yeeley, mamnuuciddani waxey ood ka tahay, arrimo kaloo assalba xaaraan ah. Fuqahada madaahibtoo dhani waxey isku waafaqeen,  xaaladda lagu mamnuucayaayi camal marmarsiiyo u noqonaya camal kaloo xaaraan ah, iney noqotto “malaha iney marmarsiiyadu u geysaayi camalkii xaaraanta ahaa uu ka xoog badanyahay, malaha iney u geyn weydo ah”. Hase yeeshee waxey isku khilaafeen, sida loo qeybinayo malayaashan, waxeyna u qeybiyeen “malaha dhicidda falka xaaraanta ah, afar heer.

**Malaha dhicidda falka xaaraanta ah isagoo loo marayo falal assalkoodu bannaanyahay**

**La hubo** | **Badanaa** | **Dhici Kara**

Afar nooc oo “malayaasha” ah, sida ay dhigeen fuqahada u dhuun daloola masaa’isha oodidda albaabada marmarsiiyooyinka, afartuna waa: mid la hubo, mid badanaa dhacda, tu suuragal ah iney dhacdo iyo mid dhicideedu naadir tahay (yar tahay).
Waxaan halkan ku soo badhigeynaa, tusaalooyin dhowr ah, oo ay ku caddeeyen noocyadaa afarta ah een kor ku soo sheegney.

1-Fuqhadu waxey tusaale ugu soo qaataan falka sameyntiisu ay dhibaato la hubo keeneyso, inuu qof god ka qodo waddada shacabka (waddada guud), waxey fuqahadu isku waafaqsanyihiin, mamnuucidda falka noocanoo kale ah, waxeyse isku khilaafeen inuu qofka noocan ahi uu cuquubo mutteysan iyo inuu masuuliyad buuxda u qaadi wixii dhibee falkaa ka yimaada. Nuxurka khilaafkuna waa: ficil mamnuuciddase ma waxaa ku jirta cuquuba-mutteysiga qofkii ku dhaqaaqa falkaa mise maya?

2-Tusaalaha uu u soo qaatey Shaatibi ficilka dhibta ka iman kartaayi ay "nadir" tahay, waa iibinta cinabka, maa daama dadka u adeegsan kara khamri sameyn ee aad u yaryihiin. Hadaba "wadda oodiddu" ama marmarsiiyo xidhidu halkan kama hirgaleyso sida ay fuqahadu yidhaahdeen; sababtoo ah faa'idooyinka ku jira falkan ayaa aad uga badan dhibta laga filayo.

3-Fuqahada qaar waxey qabaan iney dhibaatadu "badanaa dhici karto" marka hub laga iibiyo dadka waqtiga fitantu socoto ee dadku is leynayaan, amaba cinab laga iibiyo qof khamri sameeye ah. Culumada mad-habta Maalikiyada iyo Xanbaliyadu waxey qabaan "sabab oodid", waxaase khilaafey Shaaficiyada iyo Xanafiyada oo yidhi dhibka aan u xaaraantinnimeyneyno iibkan waa inuu noqdo mid la hubo, si aan u xidhno marmarsiiyada.

4-Fuqhada qaar waxey qabaan iney dhibi dhici karto hadey ruux dumari kaligeed socoteyso, iyo markey dadku isticmaalayaan xeelado fiqhi oo macnaheedu yahay heshiis muuqaalkiisa kore inuu saxan yahay la moodo, laakiin ay ku dhex jirto ribo. Halkanna

Maalikiyada iyo Xanaabilada ayaa isku waafaqsan in albaabadan la oodo, halka culumada kale garab mareen, maxaa yeeley; dhibtu mid la hubo ama ay badantahay iney dhacdo ma aha.

Tusaalayaasha aan kor ku soo xusney waxey si cad inoogu tilmaamayaan, in kala saaridda "qaababka iyo yoolasha" iyo malayaasha la xidhiidha ay ku xidhantahay, duruufta siyaasadeed, dhaqaale iyo buulsho, oo aynan ahayn wax sugan. Tusaale ahaan, haweeneyda kaligeed socotteyneysa, iibinta hubka iyo cinabku, waxaa dhici karta mararka qaar iney dhibaato ka timaado, waxaa kaloo hubanti ah in mararka qaarna ay faa'ido ku jirto. Sidaa darteed waxaan habooneyn in la qeybiyo falal assalkoodu banaanyahay qeybintii kama danbeysta ahayad oo la yidhaado tani waa xaaraan waligeedba, tanna xalaal waligeeba.

"Xidhidda albaabada marmarsiiyooyinku" markii laga eego dhinaca akhlaaqda, waa nooc xukun bixin ah iyadoo laga duulayo, natiijada ficilka ka dhalaneysa ama wuxuu ku danbeyn doono, wuxuuna noqon karaa mararka qaar wax faa'ido leh, marar kalena dhibaatooyin ayuu keeni karaa, oo waxaa adeegsan kara kooxaha mayalka adag, ama shakhsiyaadka danaha siyaasadeed wata. Maanta waxaan arkeynaa sida xun ay Daahiriyada cusubi-sida ku sifeeyey Al-qardaawi- u adeegsanayso mas'alada "marmarsiiyo oodidda" gaar ahaan arimaha la xidhiidha dumarka. "Waddo-danbi" Ayaan xidheynaa darteed ayaa loogu diidey dumarku iney baabuurta wadaan, iney safraan kaligood, iney ka shaqeeyaan xarumaha idaacadaha iyo telefishinnada kana qeyb galaan golayaasha siyaasadeed, bal iney waddada maraan sida qaarkood ay qorayaan! Waxaan halkan soo bandhigayaa fatwo caddeyneysa

si xun u adeegsiga “waddo-danbi oodidda” si akhristaha sharafta mudani uu arko wixii la yaabka lahaa een arkey.

[**Su’aal**] waxaan jecelahay in la caddeeyo waxa ay shareecadu ka qabto, dumarku iney baaburta wadaan, maxaadse ka qabtaan aragtida leh naagta iney iyadu baabuurka iska wadato ayaa ka dhib yar iney dirawal ajaniba ah raacdo?

-Jawaabta arrinta laga bixinayo waxey ku saleysantahay…. Waxa xaaraan sabab u noqonayaayi isna waa xaaraan… sidaa owgeed, baabuur-wadidda dumarka waxaa ku hoos jirta mafaasid fara badan.

Waxaana ka mid ah, xijaab bixin, sababtoo ah; baabuur-wadiddu waxey keensaneysaa waji furid oo ah meeshii ugu fitnada badneyd, deymada raguna ku badantahay … qofbaa odhan kara: xijaabkan la’aantii ayay naagtu baabuurka wadi kartaa, afkay xidhan, muraayda madowna wey gashan, tan waxaan kaga jawaabeynaa oon leenahay: arinkaa la sheegey ma sameynayaan dumarka u heellan wadidda baabuurka… waxaa kaloo dhibaatooyinka ka mid ah, xishood ka tagidda…waxaana ka mid ah, bixid badnida dumarku ay guriga ka baxayaa…waxaana ka mid ah, iney naagtu noqoto xadhka goys, markey doonto iyo meeshey doonto u baxda, ciddey doontana halkey doonto ugu tagta, intey doontana maqnaata, laga yaabaa ilaa waqti danbe oo habeenkii ah…waxaana ka mid ah, iney naagtu ka fallaagowdo reerkoodii iyo ninkeedii, sababta ugu yar darteedna uga baxdo guriga, baabuurkeedana qaadato meeshey is leedahay wey ku nafisina ku hagaagto… waxaana ka mid ah, iney fitno sabab u noqoto siyaabo badan darteed, sida: markey nalalka wadooyinka

istaageyso, markey kaalmaha shidaalka joogsaneyso, markuu baabuurku ka xumaado, maxey xaaladdeeydu noqoneysaa markey gargaar u baahato, waxaa dhici karta iney la kulanto nin akhlaaq xun oo sharafteeda kula gorgortama si uu dhibta uga gargaaro..Dhibaatooyinka ka iman kara baabuur wadidda dumarka waxaa ka mid ah, waddada oo ay baabuurtu ku cidhiidhiyowdo, ama fursadda baabuur wadidda wiilashu yaraato, iyagoo ka xaq leh dumarka kagana haboon. Waxaa kaloo dhibaatooyinka ka mid ah, badnaanta shilalka baabuurta, sababtoo ah; dumarku wey ka go'aan, aragti iyo awood yaryihiin raga… (Iwm).

Dhinaca kale waxey soo bandhigeen culumada maalikiyada qaarkood "furidda maramarsiiyda" si ay u noqoto dhinaca ka horjeeda "oodidda marmarsiiyada". Al-qaraafii ayaa wuxuu axkaamta u qeybiyey "qaabab" iyo "ujeedooyin", wuxuu qabaa in la ogolaado qaab walboo ujeedo wanaagsan lagu gaadhayo, lana xidho/la diido qaab walboo ujeedo khaldan lagu gaadhayo. Halkan waxaan ka arkeynaa sida uu al-qaraafi isugu xidhey ujeeddada iyo waddada loo marayo, taaso ka dhigan ujeeddada wanaagsan waddada loo marina wey wanaagsantahaey, ujeedadii xunna waddada loo mari wey xumaan oo lama ogola in la qaado, isagoo tan ka duulaya ayuu wuxuu hindisey seeddex darajo oo ujeedooyinkiii ah, waana "mid xun" "tu wanaagsan" iyo "mid dhexdhexaad ah". Sheikh kaloo maaliki ah oo ibnu farxuun la yidhaado ayaa ku dhaqan galiyey qaacidada al-qaraafi dhowr xukun oo axkaamta ka mid ah.

| | | |
|---|---|---|
| **Ujeedo xun oo waddada loo marina mamnuuc tahay** | **Ujeedo dhexdhexaad ah waddadeeduna furantahay** | **Ujeeddo wanaagsan wddadeeduna bannaantahay** |

**Noocyada Ueeddooyinka iyo wadooyinka loo marayo sida uu al-qaraafi sheegey.**

Haddaba waxaan arkeynaa sida aynan maalikiyadu ugu koobneyn ka fikirka dhinaca xun ee falka, waxey ballaadhiyeen deymada dhinaca wanaagsanee ficilka, taasoo keeneysa in dadka lagu booriyo fal walboo wanaag ugu jiro dadka, nusuusta shareecadaba yuunana ku xusnaaninee.

## Xaqiijinta Ujeeddada "Caalaminimada Shareecada"

Caadooyinka sharcigu tixgalinayo waa caadooyinka wanaagsan eey bulsho leedahay. Laakiin xidhiidhka ka dhaxeeya sharciga iyo caadada wuu dhaafsanyahay tix galin kaliyeetta, waxaa dhab ah in caadooyinka carbeedi ay saameyn weyn ku yeesheen fahanka axkaamta fiqihiga qaarkeed, haba ahaato waqtiyadii hore amaba kuwii danbee taariikhda islaamka. Sidaa darteedbuu Ibnu Caashuur u soo bandhigey aragti cusub oo kuu saabsan assalka caadooyinka iyadoo laga duulayo ujeedooyinka shareecada Islaamka. Wuxuuna ku qorey kitaabkiisa uu ku magacaabey "Ujeedooyinka shareecada" fassal uu u gaar yeeley caadooyinka, wuxuuna ku magacaabey fassalkaas "guud ahaanta shareecad Islaamka". Kagamuunan hadlin Ibnu Caashuur raadka ay caadadu ku yeelaneyso dhaqan galinta xadiista sidii jiri jirtey, ee wuxuu kaga hadley raadadka caadooyinka carabtu ay ku yeesheen fahankeena aan axaadiista u leenahay. Wuxuuna ku billaabey ibnu Caashuur caddeynta ah inuu ka duulo qofku "Caalaminnimada Islaamka", sababtoo ah; Culumada Islaamku waxey caddeynayaan iney shareecadu u suubatto, cid walba, meel walba iyo waqti walbaba, taana waxaa caddeynaya aayado iyo axaadiis farabadan, wuxuuna xusey ibnu caashuur tiro ka mid ah ***nusuustaas*** (aayadahaas iyo axaadiistaas). Kadibna wuxuu ku sii ballaadhey xikmadaha ka danbeeya doorashada Nabiga (scw) laga dhex doortey carabta, waxaana ka mid ah xikmadahaas, ilbaxnimo la'aanta carabta, taasoo u fududeysey bulshooyinkii kaleen carabta cadaawad u qabin iney dhex galaan carabta, halka ay Ummadaha Faaris, Roomaanka iyo Qibdiyiinta aynan ahayn sidaas, wuxuuna qorey isagoo leh:

Waxyaabaha ugu weyn ee caddeynaya guud ahaanta Shareecadan, waa sinnaanta ay u simanyihiin dadkoo dhani axkaamteeda hadba awoodoodu iney tahay…xikmadaa daraaddeedbaana Ilaahey uga dhigey iney ku saleysnaato cillado iyo ujeedooyinka fahankeeda maanka dadku u simanyahay, oo kala duwanaanshaha bulshada iyo dhaqamada aan ku xidhneyn…waxaanan dhabeysanahay, bulsho caadadeedu, iney xaq u laheyn in lagu khasbo bulsho kale markii loo sharci dajinayo, bal ee kuwii caadada lahaaba kuma khasbanaayayaan…waxaa halkaa inooga cad, in laga bixi karo wareer badanoo ka heysta culumada qaar, sababta loo xarimayo, timo xidhiidhinta dumarka, ilko qoridda iyo tumashada jidhka, inkastoo aynan muuqannin wax dhiboo ku jira… aniga waxey ila tahay, falalkaasi carabta agteeda waxey ka ahaayeen, calaamado tusinaya dhowrsanaan la'aanta haweeneyda, diidmada falalkaasina waa diidmo wixii falka u sababta ahaa iyo issu bandhigidda ku xad gudubka sharafteeda. Wuxuu Alle quraanka ku leeyahay:

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّبِيُّ قُل لِّأَزْوَٰجِكَ وَبَنَاتِكَ وَنِسَآءِ ٱلْمُؤْمِنِينَ يُدْنِينَ عَلَيْهِنَّ مِن جَلَٰبِيبِهِنَّ ۚ ذَٰلِكَ أَدْنَىٰٓ أَن يُعْرَفْنَ فَلَا يُؤْذَيْنَ ۗ وَكَانَ ٱللَّهُ غَفُورًا رَّحِيمًا ﴿٥٩﴾ "الأحزاب: 59

Marka waxey noqoneysaa in la yidhaado tani waa axkaam dhaqankii carabta lagu tixgaliyey, ku aan jilbaabada caado u lahaynna nasiib kuma leh shareecada…marka waxaa lagama maarmaan noqoneysa in la yidhaaahdo: suubanaanta shareecadu ay u suubantahay meel walba iyo mar walba macnaheedu waa guud ahaanshaha axkaamteeda iyo wanaag xambaarsanaanta,

lana arko muuqaallo kala duwanoo hal xukun ah, ujeedooyinkooduna mid yihiin.

Ujeedddada "Caalaminimada Shareecada" owgeed ayuu ibnu Caashuur u soo bandhigey qaab lagu fahmi karo axaadiista iyadoo lagu saleenayo dhaqankii carbeed ee waagaa jirey, loona fahmin iney yihiin qawaacid furan oo shuruud la'aan ah. Sidaa darteed ayuu ibnu Caashuur u fahmey axaadiistii aan kor ku soo xusney iney ku saleysanyihiin nidaamkii akhlaaqeed iyo dhaqameed ee waqtigaa jirey, aheynna kalimado sidooda u dhaqan galaya. Fahankanoo kalena wuxuu aad u suuro galinayaa dabacsanaanta shareecada iyo iney ka dhaqan gasho deegaamada iyo xaaladaha kala duwan ee dadku ku noolyihiin, gaar ahaan deegaamada ka baxsan bulshooyinka carabta.

## Ujeedooyinka Shareecadu waa mabaadi' ay wadaagaan madaahibta kala duwanee Islaamku

Dhacdooyinkii qarinigii 21aad waxaa ka mid ahaa kala qeybsanaantii darneyd ee madaahibta Islaamka! Waxaana ugu sii darnaa kala fogaanshaha daran ee dhex taagan Shiicada iyo Sunnada, kaasoo ay dad badani u arkaan inuu yahay uun kala fogaansho siyaasadeed oo isu badashey muuqal "mad-habeed".
Dadka u dhuun daloola madaahibta fiqhiga ah, waxey ogaadeen in kala duwanaanshaha maanta iyo shaleyba taagan, ee u dhaxeeya mad-habta shiicada iyo sunnada, aasaaskiisa xaqiiqigu yahay waxa lagu magacaabi karo "siyaasad" ee uusan ahayn waxa aan u naqaano "caqiido". Si kastaba ha ahaade, khilaafku wuxuu gaadhey fagaaro walba, maxkamado, masaajid iyo xidhiidhada bulshadaba; taasoo keentey, in khilaafaadku gaadhaan dowlada

dhowr ah dhexdood heerar dhiig daadin ah, waxaanan qorsooney in si gaar ah dowr weyn oo dab hurin ah uga ciyaarayso siyaasadda dowliga ahi. Ismaan dhaafyadaa qottada dheerna waxey dhaliyeen iney aad u baahdo, aragti gaabni, aqooni la'aanta cidda kaa aragti duwan iyo nabad ku wada noolaansho la'aan, iyadoo laga duulayo wanaag wadareedka.
Run ahaantii, markaan baadhitaan guud ku sameeyey kutubta ay Culumada Shiicada iyo Sunnaduba ka qoreen mawaadiicda "Ujeedooyinka shareecada" waxaa ii soo if baxdey, in si isku mid ah u baadheen ugana hadleen mawaadiicdaas, labada kooxoodba waxey u noqonayeen culumo iyo kutub isku mid ah (kitaabka Aljuweyni ee "*alburhaan*" kitaabka Ibnu baabaweyh ee "*Cilalushariicah*" kitaabka Shaadibi ee "*Almuwaafaqaat*" , kitaabka Assadri ee "*al-usuul*", kitaabka Ibnu Caashuur ee "al-maqaasiid, bal waxeyba isticmaalaan labada kooxoodba erey-cilmiyeedyo isku mid ah. Khilaafyada ugu badanee u dhaxeeya culumada shiicada iyo sunnada, ma aha usuusha iyo ujeedooyinka, waa khilaaf ku saabsan sugnaashaha axaadiista qaarkeed oo keetey in la isku khilaafo ku dhaqanka axkaamta qaarkeed.
Laakiin qaabka ujeedo-raaca ah ee lagula dhaqmayo fiqhiga waa qaab ballaadhan oo ku koobneyn fahan hal xadiis oo kaliya ah, ama qaadasho aragti gooni ah, balse waa qaadashada mabaadii'da guud iyo fahan-wadareedka qof walboo muslimi u soo istaagi karo. Ujeedooyinka guud ee diintuna waxey u adeegayaan ahdaafta sare oo ah midnimada muslimiinta oo iska kaashada culeysyada wada saaran, taasaana ka muhiimsan laamaha fiqhiga. Isagoo tan ka duulaya ayaa Aayatullah Mahdi Shamsaddiin uu

xaaraantinnimeynayaa xad-gub kasta oo ay issu geystaan labada dhinac ama cid kaleba, taasina waxey ku saleysantahay, ujeedooyinka sare ee ay ka mid yihiin; Isfahan, midnimo iyo cadaald.

Haddaba qaabka ujeedo-raacu waxuu aqoonta iyo aqoonyankaba gaadhsiinayaa heer sarreeya oo ay arrimaha ka eegaan, taasaanan kaga guuleysan karraa khilaafaadka siyaasadeed een ka dhaxaley taariikhdeena Islaamka, wuxuu kaloo qaabkani nagu boorinayaa dhaqanka is af garadka iyo wado noolaanshaha nabadeed een maanta aadka ugu baahannahay.

## Ujeedooyinku waa Dhidibada wada Hadalka Diimaha

Aragtida nidaamsan ee lagu diraaseeyo diimaha, waa manhaj guud oo lagu darso diimaha ama diin kaligeed, iyadoo laga qaadanayo diintaas muuqaal dhameystiran. Diraasadan oo kale waxaa lagu soo qaadanayaa dhinacyada la xidhiidha diintaasoo dhan, taariikhdeeda, falsafaddeeda, culuumteeda iyo akhlaaqdeeda, taana waxaa looga gol leeyahay in muuqaal guud oo ah aasaasyada diintaa ah la ogaado. Qaabkan casriyeysanna wuxuu suura galinayaa in si nidaamsan loo diraaseeyo diintii iyadoo loo arkayo iney yihiin aragtiyo-bulshadeed aad u soo kordhaya gaar ahaan marka la eegoo Caqiidada Kiristaanka. Manhajkan oo ay Kiristaanku adeegsadaan wuxuu is hor dhigaa su’aalo uu ku diraaseenayo Diintaa, kuwooda ugu muhiimsanna yihiin: muxuu na barayaa kitaabka muqaddaska ah, markaan si guud u eegno aragtida uu ka qabo mowduuc gaar ah? Sidaa awgeed diraasadan waxey uruurineysaa dhamaan *nusuusta* ku soo arootey ama xidhiidhka la leh mowduucyada kala duwan ee

kitaabka ku taalla. Mawaadiicda la diraaseeyana waxaa u badan: salaadda, cadaaladda, toosnaanta, naxariista, midnimada, kala duwanaanshaha, badbaadada… iwm. Sidaa darteed manhajkani wuxuu adeegsadaa "***dariiqadda akhriska qottada dheer***", taasoo cilmi baadhaha ku kallifeysa "uruurin, noocyo u kala dhigid, isku buuxinta "waxey ku magacaaben" "***xaqiiqooyinka baahsan***", balse mararka qaar waxaa la diraaseeyaa waxyaalo aan caqliga u cunnamin si loo ogaado xidhiidhka ka dhaxeeya afkaartaas, loogana gudbo afkaarta guud sida ay ku tilmaamayaan.
Waxaa fahan inoo kordhin kara inaan halkan ku soo bandhigno sababaha uu sheegey Tashaarles Hodaj (1797-1878) oo timaamaya ahmiyadda dariiqadda nidaamsan ee diraaseynta Diinta.

1- Dhisidda caqliga aadamaha suura gal uma aha inuu ka fogaado aragtida guud ee nidaamineysa waxyaabaha uu aaminsanyahay.
2- Waxey faa'ido u leedahay uruurinta xaqiiqooyinka kala tagsan si ay u yeelato qaab aqooneed sarreeya.
3- Dariiqaddani waxey muhiim u tahay bandhig lagu qanci karo kana ilaashan bushin badan.
4- Qaabka diraasaddani waa qaabka dabiiciga ah ee loola dhaqmi karo culuutmta Diiniga iyo kuwa dunyawigaba, waana qaabka Ilaahey dadka amrey iney u dadaalaan, abuurkiisana fahmaan, xidhiidhada kala duwanee ka dhaxeeyana ogaadaan.

Aragtidan diraaseynta Diimaha markaan u fiirsanno waxaan ka fahmeynaa iney iyada qaabka loo diraaseeyo ujeedoyinka shareecada isu ekaansho badni ka dhaxeyso, sidaan soo

aragneyba ujeedooyinka shareecada waxaa loo diraaseeyaa inta si qotte dheer loo akhriyo *nusuusta* shareecada lagalana soo baxo asaasyadeeda guud, sida cadaaladda, akhlaaqda iyo masaalixda noocyadeeda kala duwan

Aragtida ujeedooyinka shareecaduna waxey dhigeysaa daruurooyin dhowr ah oo ay shareecadu ku dadaaleyso ilaalinteeda, sida: ilaalinta Diinta, Nafta, Maalka, Caqliga iyo Taranka, sidii aan horey u soo marreyba. Sidoo kale baadhayaasha wax ka qora Diimaha waxey baadhaan afkaarta isku dhow, sida: ilaalinta nolosha iyo caafimaadka, iyadoo la xaaraantinnimeynayo maandooriya xadka uu maanka ku doorinayo. Inkastoo Islaamnimadu aynan taa banneynenin, maadaamaa ay diidantahay, maandooriye kasta haduunan gaadheyn xattaa inta uu wax ku sakhraamiyo. Waxey kaloo baadhaan mudnaansiinta qoyska iyo ilaalintiisa, tanna waxey shabahdaa ilaalinta qoyska iyo masaalixdiisa xaga ujeedooyinka shareecada.

Aragtida ujeeddada ku saleysan waxey culumada diinta u suuro galineysaa, iney isu keenaan awaamirta diinta ee ku saabsan mowduuc gooni ah, hoos geeyaanna ahdaafteeda guud ee kulmin karta sababna u ah soo aroorkeeda, intey mid walba goonidiisa uga sheekeyn lahaayeen, maxaa yeeley; fahan kan oo kale wuxuu qofka ka  dhigayaa mid xaraf-raac ah, oo dan ka galin qiimaha akhlaaqeed ee isku xidha nusuusta iyo ujeeddadooda diineed ee weyn, qaabka iyo muuqaalka ay awaamirta diinuguu ku soo aroorina wey kala duwanaan karta hadba sida deegaanka lagaga dhaqmayo uu yahay.

Sidaa owgeed, waxaan aaminsanahay in manhajka ku saleysan ujeedooyinka ee lagu diraaseynayo Diimaha, ama waxa lagu magacaabo “aragtida nidaamsan”’

ay dowr weyn ku leedahay wada hadalka iyo is fahanka Diimaha kala duwan. Aragtida ujeedo-raaca ah waxey dhigeysaa qdobo guud oo asaas u noqon kara wada hadalkaas iyo is fahankaas.

## Dhaqan Galinta Ujeedooyinka Shareecada

Waxaa barta ilektrooniga ee **Islamonline.net** laanteeda ah **readingislam.net** igu soo gaadhey su’aalo dhowr ah oo ka kala yimid waddamo kala duwan, waxaa kaloo iyaguna jirey su’aalo iigu yimid cinwaankeyga elektrooniga. Waxaan soo bandhigayaa qaar ka mid ah anigoo ka dhimaya waxa aan anfaceynin akhristaha kitaabkan. Ujeedaduna waxey tahay inaan caddeeyo sida ay suuragal u tahay iney ujeedooyinka shareecadu bixiyaan xalal ku aadan mushkiladaha casrigan ee la xidhiidha shareecada islaamka, su’aalahaasoo bandanna , waa kuwo ay is weydiiyaan dadka muslimiinta ah iyo kuwa aan aheynba meel walba ha joogaane.

**(Su’aal)** markaan ka hadleyno ujeedooyinka shareecada waxaan ka hadleynaa waa akhlaaq, miyeyna sidaa ahayn? Anigoo ah Nin Muslima oo ku nool galbeedka, waxaa ii muuqda farqi weyn oo u dhaxeeya mabda’a akhlaaqiga ee Islaamka iyo mabda’a akhlaaqeed ee reer Galbeedka. Farqigaasina wuxuu ku saleysanyahay waxa loo yaqaan sugnaansha akhlaaqda iyo is badbaddalkeeda,

**(Jawaab)** su'aashan muhiimka ah waxaan kaga jawaabayaa laba qodob:

(1) Waa inaan kala saarna qiimayaasha akhlaaqda oo ah ujeedooyinka sare iyo qaab dhaqanka kala duwan een ku fulineyno akhlaaqda. Ujeedooyinka sare ee diintu waa sida: (cadaaldda, sinnaanta, ammaanada, xurriyadda, dhowrsanaanta, wada noolaanshaha…iwm waa wax sugan, marnaba isbadal kuma iman karo, si kastoo waqtiga iyo meesha la joogo ay is badalaan. Dhaqamada aan ku gudaneynose wey kala duwanaan karaan, hadba sida waqtiga iyo meesha la joogo ay tahay, hase yeeshe waa in loo gutto qaab xoojinaya qiimayaasha sare een soo sheegney. Cadaaladdoo kale waa mabda'a sugan mar walbaba, laakiin in xukun caadil ah maxkamadii laga rido waxey ku xidhantahay, waxa dhaqan ahaan cadaalad loo yaqaano, bulshada ay maxkamadaasi ku taalo. Sababtoo ah; cadaaladu waxey keensaneysaa shuruud, xuquuq iyo waajibaad kala saaran xubnaha qoyska, bulshada iyo xukuumaddaba, iyadoo la raacayo nidaamka dhaqan dhaqaale iyo siyaasadeed ee bulshadaa u yaalla. Waxaa dhici karta in qaabka ay u kala leeyihiin xubnaha qoysku xuquuqdaas iyo waajibaadkaas uu ka duwanyahay bulsho kale markii la tago, amaba nidaam siyaasadeed iyo dhaqaale oo u shakhsiyaadka iyo kooxaha bulshadaba xuquuq iyo waajibaad ay isla yaqaanniin kala siinaya. Hadaba kala duwanaanshaha dhaqan dhaqaale iyo siyaasadeed ee ay bulshooyinku leeyihiin waa in xisaabta lagu darsado markii la rabo iney cadaaladu fusho.

(2) Waxaa kaloo haboon inaan si adag u sheegno in cibaadaadka sidooda loo fulinayo, wax is baddaloo ku iman karaana uunan jirin, maxaa yeeley; waa aasaaskii diinta oo qof

walboo Muslim ah loo baahanyahay inuu ku dhaqmo mar walba iyo meel walbuu joogaba. Tusaale ahaan shanta salaadood wax is baddal ah oo ku iman karaa ma jiro (qaabka loo tukanayo, weysadeeda, tiradeeda, waqtiyadeeda, dhaqdhaqaaqeeda sujuudda iyo rukuucda iyo wixii lagu dhex akhriyi midnaba wax is baddal ah kuma iman karo), Sidoo kale sakada, inta la bixin iyo cidda la siinba. Cibaadooyinkaa aan soo sheegney iyo kuwa la midka ahba lama filayo inuu wax is baddali ku yimaado, oo qofka Muslimka ah wuxuu si buuxda u raacayaa hanuunkii Nabiga (scw). Qofna kuma fikiri karo inuu karti u leeyahay wax ku darka ama ka dhimidda qaabka ay u soo arooreen cibaadooyinkaas. Howlaha mucaamilka dadkase waxaa saameyn ku yeelan kara xikmadaha loo jideeyey iyo hadba sida loo xaqiijin karo.
Waxaan mar kale si adag u sheegeynaa in falalka la xaaraantinimeeyey (sida cabidda khamrada, inteeda yar ama badan, qamaarka, ribada iyo sinada) ay la mid yihiin sida cibaadaadka aan ku soo sheegney oo kale; maxaa yeeley waxaa kitaabka iyo sunnadaba ku soo aroorey ereyo sugan oon muran iyo ka fiirsasho midna aan aqbaleynin. Waxaa u suuroobeysa cilmi baadhaha inuu u fiirsado xikmadaha ka danbeysa axkaamtaas, waxaanan shaki ku jirin inaan gaadheyno xikmadahaas, lagana yaabaa inaan ku doodno xikmadu ma tanbaa mise waa taa? Hase yeeshee waxaan muran ku jirin iney jirto axkaam kitaabka iyo sunnada ku soo aroortey oo qofka muslimka ah waajib ku tahay inuu fuliyo inta uu diintan heysto.

**(Su’aal)**: sideebey suuragal u tahay iney shareecada islaamku u caawiso koboca akhlaaqda bulshada Islaamka dhexdeeda waqtigan isbaddaladu ay xowliga ku socdaan?

**(Jawaab)**: shareecada Islaamku waxey leedahay summad gooni ah, oo ah iney uga gol leedahay xukun walboo axkaamkata ka mid ah iney ku xaqiijiso dhinac akhlaaqeed, cibaadaadka iyo macaamilka islaamkaba waxaa hadaf u ah xaqiijin akhlaaq gaar ah. Rasuulkana (scw) waxaaba loo soo direy dhammeystirka akhlaaqda wanaagsan, siduu isaguba sheegey. Haddaan tusaaleyaal soo qaadano, Alle wuxuu salaadda ku sheegey iney xumaatada iyo munkarka reebeyso, xajkana inaan laga ogoleyn xumaan, danbi iyo dood, ujeeddada sakaduna iney tahay maal qabeenka ka qaadoo sabuulka u qaad. Dhammaan axkaamta shareecada, macaamilka ganacsi iyo heshiisyada waxaa looga gol leeyahay dhidib u aasidda qiimayaasha akhlaaqda, sida ilaalinta xuquuqda maaliyadeed, cadaalad, ammaano, khiyaamo diid iyo ilaalinta xuquuqda tabarlaawayaasha. Haddii shareecada islaamka si dhab ah loo dhaqan galin lahaa, akhlaaqda wanaagsan ayaa bulshada ku faafi lahayd. Si kale markii loo dhigana shareecada islaamku waa "Dastuur akhlaaqeed" ee ma aha "Dastuurka culumada diinta" sida maanta loo yaqaano.

**(Su'aal)**: Quraanku Nabi Muxammad wuxuu ku sheegayaa inuu yahay "naxariistii aduunyada", hadddaba sidey taasi ku iman kartaa anagoo arkeyna qallafsanaanta shareecadiissa? Miyeynan is burineynin qallafsanaanta nidaamka shareecada iyo naxariista la sheegey in sababteedaba loo soo direy. Waxaan rajeyneynaa inaad mowduucaa wax nooga iftiimisid.

**(Jawaab):** waa run Rasuulku (scw) waa "naxariistii aduunyada", umana maleynayo shareecada lafteeda iney wax mushkiladi ku jirto, maxaa yeeley; waa nidaamka Islaamka ee dadkoo dhan

naxariis u ah, waana nidaam dhaqn (akhlaaqi ah) oo aad u sarreeya. Markan oo kale waxaan xasuustaa, hadalladii caalimkii weynaa Shamsuddiin Ibnulqayim (dhi: 748h/1347m) oo lahaa: shareecadu waxey ku saleysantahay xikmad iyo masaalixda adoomada aduun iyo aakhiroba. Kulligeedna waa cadaalad, naxariis, xikmad iyo maslaxad. Mas'alad walbo ka baxda cadaalada, una baxda dulmi, naxariistana dhaafsan, maslaxadda iyo xikmadana ka baxsan shareecada ka mid ma aha, si khaldanba ha loo galiyee!

Laakiinse waxaa jiri kara mushkilado waaweyn oo ka dhalashey fahan xumo laga qaatey shareecada waqtiyo hore iyo maantaba, waxaa kaloo la arkaa khaladaad dhaca markii la isku dayo dhaqan galinta shareecada, arrimahaasoo keenaya dareen khaldan in la qaato shareecadii sida kaa aad sheegtey oo kale. Sidaa darteed, iyadoo ay shareecadu ku dhisantahay xaqiijinta ujeedooyinka wanaagsan; sida: cadaaladda, naxariista, xikmadda iyo maslaxadda, ayaa waxaa jiri kara dadka qaarkood markey gaadhaan martabado aqooneed iyo siyaasadeed oo sare, iney shareecadii si xun u adeegsadaan, iyagoo raba iney manaaficdooda aduun ku gaadhaan. Haddaba kuwaasoo kale waxey faafiyaan ama fuliyaani waa fahankooda khaldan ee iyaga u gaarka ah, iyagoo uga jeeda iney ku fushadaan dana gaar ah. Shakina kuma jiro kuwaasoo kale iney dhaawac u geysanayaan muuqaalka islaamnimada in ka badan inta uu cadow geysto.

**(Su'aal)**: Jeceylku waa wax naftu aad u raadiso noloshan dhexdeeda, jeceyl oo uu qofku la wadaago qofka uu jecelyahay waa liibaanta uu qofku raadiyo aduunyadan. Haddaba maa naloo

daayo xurriyadda si aan ugu raaxeysanno jeceylka anagoo nabad ah, aynan jirinna culeysyada qoyska iyo rafaadkiisa! Sideen u odhan karnaa waa akhlaaq wanaag, qofka oo loo diido ku raaxeysiga midhaha jaceylka isagoo kaga turjumaya raaxada jidhkiisa, kuna tilmaanaa taasi iney tahay "ujeedooyinka akhlaaqeed" ee shareecada?

**(Jawaab)**: Tanoo kale waa dhinacyada Muslimiintu ay shareecada ku dhaawaceen, waanana run jeceylku sida aad usheegtey waa nimco weyn oo ilaahay dadka ku manneystey, waana wax dabiici ah inuu qofku qof kale jeclaado, xidhiidh jidheed oo uu jeceylkaa kaga turjumayana uu sameeyo. Islaamkuna dabeecadaa col lama aha, balse wuu nidaaminayaa, yaa yidhi Islaamku jecelka wuu diidaa? Islaamku wuxuu diidey waa: "xidhiidhka jidheed ee dhaxmara laba qofoon is guursan". Waxaase isweydiin leh maxaa loo diidey xidhiidhkaas? Islaamku wuxuu is barbar dhigayaa laablakaca jeceylka iyo qiimo kaloo weyn, waana koboca qoyska iyo liibaantiisa, qoyskuna Islaamka dhexdiisa waa aasaaska liibaanta bulshada.

Hadii Nin xaas leh ama Naag Nin leh ay ku dhacaan sinada, waxey galabsadeen "danbi" markii loo eego Islaamnimada? Falkaasi inkastuu dusha uga egyahay natiijo jeceyl, haddana wuxuu si toos ah u burinayaa macnaha qoyska ee islaamnimadu rabto iney ka dhabeyso. Hadiise labada is jecel aynan is qabin, diintu ma diideyso jeceylka noocaa ah; ee waxey xaaraantinimeyneysaa iney sameeyaan xidhiidh galmo inteynan is guursan. Sidoo kale amarkaasi wuxuu ka duulayaa is barbardhiga jeceylka iyo qiimaha weyn ee qoysku ku fadhiyo,

maxaa yeeley; diintu waxey ku boorriyeysaa guurka waddadiisana fududeyneysaa, waxaana Nabiga (scw) laga wariyey inuu yidhi: “ma arag labada is jecel guur wax uga fiican”. Islaamku guurkuu nagu boorinayaa, su’aasha imeynaysaayi waxey tahay, maxaa dhici kara, haduu ilmo ka yimaado xidhiidhka labada qof een is guursan? Ma cadaaladbaa inuu ilmo aduunyada yimaado iyadoon xidhiidh guur iyo waalid xil iska saara uunan jirin?

Waxaa kaloo xusid mudan, hadii labada qof ee is guursatey dib dhigayaan dhalashada ilmaha ayagoo sabab sababaha ka mid ah cuskanaya, diintu wax diidmo ah kama qabto. Hase yeeshee haduu ilmoba aduunyada imanayo waa inuu ku yimaadaa nidaam qoys, taasina waxey ilmaha ka badbaadineysaa dulmi weyn, waxaana tusaale noogu filan, culeysyada ilma korinta ee ku dul dhacaya hal waalid, siiba hooyada. Hdaba jeceylku waa wax aad u wanaagsan sidaad sheegtey, laakiin diintu waxey barbardhigeysaa ujeedooyinka kale ee qoyska iyo bulshada.

**(Su’aal):** sidee loo odhan karaa islaamku waa diin akhlaaqeed isagoo dhiiri galinaya argagixisnimada?

**(Jawaab):** su’aashan waxaan kaga jawaabayaa inaan kala saaro argagixintu waxey tahay iyo waxa aynan ahayn, kadibna jwaabtu iskeed bey u caddaaneysaa.

Argagixisnimadu diin ma leh, saxna ma aha in la yidhaahdo: diin Islaam, tu Kiristaan, Yahuud, Hinduus ama diin ay dooni ha ahaato, waxey la xidhiidhaa argagixisnimada. Miyeynan kutubta Diintu aynan ahayn meesha ugu wanaagsanee laga ogaan karo

diintaasi waxey tahay? Hadaba kutubtaa waxaan ka argnaa waa argtiyo ay ka qabaan khaaliqa iyo caalamka, waxaan kaloo arkeynaa iney dhammaantood ku tababarayaan atbaacdooda mabaadi' kooban, akhlaaqda wanaagsan iyo kor yeelidda ruuxda, inkastoo ay isku khilaafsanyihiin waddadii loo mari lahaa.

Argagixisnimadu ma aha waxyeello kasta, dadka caqliga leh oo dhan waxey aaminsayihiin waxyeellada qaar iney banaantahay, dadkoo dhan wey ogolyihiin inuu qofku waxyeelo geysto si uu naftiisa u daafaco, waxaanan ognahay taasi iney lagama maarmaan tahay haduu qof ku soo weeraro, waxaa kaloo lagama maarmaan ah in waxyeelo la geysto si gacanta loogu dhigo danbiilayaasha (taana dowladahaa isticmaala). Dadkuna waxyeelo wey geystaan markey ugaadhsi ku jiraan, hadeynan aheyn dadka hilibka mamnuuca. Xaaladahaa aan soo aragney oo dhan dadku uma arkaan in waxyeelooyinkaasi khalad yihiin, waxyeelleyntu iskeed danbi uma aha, ee waxey ku xidhantahay qaabka iyo cidda loo isticmaalayo.

Naftaada ood difaacdana argagixisnimo ma aha. Kaba soo qaad tusaale ahaan, iney dad ku soo weerareen, gurigaagii lagaa eryadey, lalana wareegey, cid ku difaacdana jirin. Miyeynan xaq ahayn inaad is difaacdo?  Hase yeeshee is difaacaagu kuuma banneynayo inaad cid aan danbi laheyn ku xad gudubto, waa inaad ku ekaato cidii waxyeellada kuu geysatey.

Argagixisnimadku kuma koobna ashkhaasta, waxaa jira kooxo argagixisooyin ah, adeegsadana dadyow ku tababaran dagaal si ay u gaadhaan danahooda. Waxaa kaloo jira dowlado argagixisooyin ah, oo adeegsada ciidamo iyo hub kala duwan si

ay dad aan waxba galabsan u burburiyaan. Waxaa kaloo dadka ku dhici kara “argagixin” aan toos ahayn, sida: gaajeysiinta, ciqabidda, ka qadinta adeegyada caafimaadka iyo cuna qabateynta dhaqaale ee ballaadhan… iwm.

Argagixisnimadu kuma koobna meelaha bulshooyinka rayidka ah ee ka baxsan goobaha dagaalka, waxaa in badan la helaa argagixin ka dhacda goobaha dagaalladu ka socdaan, taana waxey ku timaadaa markii lagu dhaqmi waayo akhlaaqiyaadka asaasiga ah ee dagaallda iyo qaabka loola dhaqmo bulshada rayidka, ciidamada iyo maxaabiista dagaalka.

Sidaa darteed, fal walboo lagu dhibaateynayo dad rayid ah, ama ciidamo aan danbi laheyn, iyadoo lagu xad gudbayo mabaadii’da iyo xuquuqul-insaanka waa argagixisnimo. Haddaba waxaan kareynaa inaan soo bandhigno qeexidda toosan ee argagixissanimadka, waana: “fal kastoo lagu dhibaateynayo dad rayid ah ama aan aheyn, iyadoo la jabinayo mabaadii’da cadaaladda iyo xuquul-insaanka.

## Gunaanad

Dhaqangalinta Shareecada Islaamka casrigeena maanta la joogo ama si xun ugu dhaqmiddeedu, inta badan waa badh-gooyo ee ma aha mid ballaadhan, waa mid xaraf-raac ah, ee ma aha mid hadaf-raac ah, waa baaxad koobanee ma aha mid baaxad ballaadhan, waa mid laga eegoo dhinac kaliyee ma aha mid dhinacyadoo dhan la eegey, waa mid wax kala saarsaarta ee ma aha mid wax isu geysa, waa mid cuskata kalmadaha iyo xuruuftee ma aha mid ujeedooyinka iyo xikmadaha xooga saarta.

Taa waxaa raaca waxa aan arkeynee sheegashada "yaqiinta cilmiga" iyo waxa ka soo horjeedee "caqli tuurka ah". Ta kaloo ah, kuwa ku andacoonaya iney "mujtahidiintu khalad laawayaal ahaayeen" iyo ku yidhaahda "nusuusta diinta waa arrimo taariikhi ah".

Arrimahaasoo dhani waxey yareynayaan ruuxaaniyadda, waxeyna kordhinayaan mayal adeyga aragtida iyo isu soo dhawaansho la'aan ka abuuranta dhinacyada is khilaafsan. Waxey kaloo kordhinayaan aragtiyada dagaalka, kali talisnimo iyo xurriyad-xayuubinta. Sidaa darteed aragtida "Ujeedooyinka Shareecadu" waxey kor u qaadeysaa heerka aragti ee lagaga wada hadalayo, arrimaha shareecada, waxeyna ka gudbeysaa khilaafaadka taariikheed ee keeney is maandhaafka madaahibta fiqhiga, waxeyna dhiiri galineysaa dhaqanka is afgarshada iyo wada noolaanshaha nabadeed ee aduunku maanta aadka ugu baahanyahay. Ugu danbeyna waxaan leeyahay, howlgalinta aragtida "Ujeedooyinka Shareecadu" waxey u baahantahy iney ahmiyad weyn siiyaan dhammaan dadka ku takhasusey

shareecada iyo kuwa bulshada u dajinaya nidaamyada kala duwan, anagoon eegeynin magacyadooda madaahibtooda midnaba, kana duuleyna aragtida ah; dadaal walboo la sameeyaayi midha keeniddiisu waxey ku xidhantahay hadaba sida uu u xaqiijinayo ujeedooyinka shareecada.